2023

# DAWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG

## GOLAHA WAKIILLADA GALMUDUG

## XEER-HOOSAADKA GOLAHA WAKIILLADA

Dhusamareb
October 2023

# Tusmada Xeer-Hoosaadka


***CUTUBKA IAAD: GOLAHA WAKIILLADA GALMUDUG ........ 4***
*Qodobka 1-aad: Golaha Wakiillada Galmudug ........ 4*
*Qodobka 2-aad: Awoodaha Golaha Wakiillada Galmudug ........ 4*
*Qodobka 3-aad: Dhaarta Xubnaha Golaha Wakiillada Galmudug ........ 5*

***CUTUBKA 2-AAD: ISUGU YEERIDADA XUBNAHA GOLAHA IYO DHISIDA GUDDOONKA GOLAHA WAKIILLADA ........ 6***
*Qodobka 4-aad: Guddoomiyaha Ku-Meel-Gaarka ah ee Golaha ........ 6*
*Qodobka 5-aad: Doorashada Guddoomiyaha Golaha iyo labadiisa ku xigeen ........ 6*

***CUTUBKA 3-AAD: GUDDOONKA, HABDHAWRKA IYO GUDDIGA ARRIMAHA GOLAHA ........ 8***
*Qodobka 6-aad: Guddoonka iyo Habdhawrka ........ 8*
*Qodobka 7-aad: Xilka Guddoomiyaha Golaha Wakiillada Galmudug ........ 8*
*Qodobka 8-aad: Xilka Guddoomiye Ku-xigeennada Golaha Wakiilada Galmudug ........ 9*
*Qodobka 9-aad: Xil Waayidda Guddoomiyaha Golaha iyo Labadiisa Ku-xigeen ........ 9*
*Qodobka 10-aad: Xilka Hab-dhawraha Golaha iyo Ku-xigeenadiisa ........ 10*
*Qodobka 11-aad: Xilka Xoghayaha Guud ee Golaha. ........ 11*
*Qodobka 12-aad: Guddiga Joogta ee Arrimaha Golaha ........ 11*

***CUTUBKA 4-AAD: XUBNAHA GOLAHA WAKIILLADA GALMUDUG ........ 12***
*Qodobka 13-aad: Xilka Xubnaha Golaha Wakiillada Galmudug ........ 12*
*Qodobka 14-aad: Xuquuqda Xubnaha Golaha ........ 12*
*Qodobka 15-aad: Xasaanadda xubnaha Golaha Wakiillada Galmudug ........ 13*
*Qodobka 16-aad: Xaadirida Fadhiyada Golaha ........ 13*
*Qodobka 17-aad: Labbiska iyo Heybadda Xildhibaanka ........ 14*
*Qodobka 18-aad: Waayidda Xubinnimada Golaha Wakiillada Galmudug ........ 14*

***CUTUBKA 5-AAD MADAXWEYNAHA DGGM IYO KU XIGEENKIISA ........ 15***
*Qodobka 19-aad: Doorashada Madaxweynaha Doorashada Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa waxa ay u dhaceysaa sidaan: ........ 15*
*Qodobka 20-aad: Eedeynta iyo Xil ka Qaadista Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa DGGM ........ 15*
*Qodobka 21-aad: Hadal-jeedinta Madaxweynaha ee Golaha Wakiillada Galmudug ........ 16*

***CUTUBKA 6-AAD: KALFADHIYADA IYO FADHIYADA GOLAHA WAKIILLADA GALMUDUG ........ 16***
*Qodobka 22-aad: Kalfadhiyada iyo fadhiyada Golaha Wakiillada Galmudug ........ 16*
*Qodobka 23-aad: Kalfadhiyada aan caadiga aheyn ee Golaha ........ 17*
*Qodobka 24-aad: Ajendaha Fadhiyada Golaha ........ 17*
*Qodobka 25-aad: Qaabka ay isugu Xigaan Hawlaha Fadhiga Golaha ........ 17*
*Qodobka 26-aad: Guntanka Kooramka ........ 18*
*Qodobka 27aad: Noocyada Codeynta ........ 18*
*Qodobka 28-aad: Habka dooda iyo Anshaxa Xubnaha Golaha ........ 19*
*Qodobka 29-aad: Hadal jeedinta Xubnaha Golaha ........ 20*
*Qodobka 30-aad: Dhexgal toosineed (Point of Order) ........ 21*
*Qodobka 31-aad: Xaqa ay xubinta u leedahay Jawaab celin ........ 21*
*Qodobka 32-aad: Ka Doodista Hindise Sharciyeed ama Mooshin ........ 22*
*Qodobka 33-aad: Hadal-jeedinta Wasiirada ........ 22*
*Qodobka 34-aad: Nidaamka Fadhiga Golaha ........ 22*
*Qodobka 35-aad: Daahfurnaanta Fadhiyada Golaha ........ 23*
*Qodobka 36-aad: Amniga Golaha Wakiillada Galmudug ........ 24*
*Qodobka 37-aad: Keydinta iyo Xafidaada Kalfadhiyada Golaha ........ 24*
*Qodobka 38-aad: Xushmada Istaaga iyo Fadhiga Golaha ........ 25*

***CUTUBKA 7-AAD HABRAACA ANSIXINTA SHURUUCDA ...... 25***
*Qodobka 39-aad: Curinta Hindise Sharciyeedyada ...... 25*
*Qodobka 40-aad: Soo Bandhigidda Hindise-Sharciyeed ...... 25*
*Qodobka 41-aad: Soo Bandhigidda iyo Akhrinta Hindise-Sharciyeedka ...... 25*
*Qodobka 42-aad: Akhrinta Hindise-Sharciyeedyada Saddex-Jeer ...... 26*
*Qodobka 43-aad: U-gudbinta Hindise-Sharciyeedka Guddiga u xil-saaraan ...... 26*
*Qodobka 44-aad: Soo Celinta Warbixinta Hindise-Sharciyeedka Heerka labaad ah ...... 26*
*Qodobka 45-aad: Wax ka-beddelid Hindise-Sharciyeed ka dib soo jeedinta Guddiga ...... 27*
*Qodobka 46-aad: Habka Dooda Wax-ka-Bedelidda Hindise-Sharciyeed ...... 27*
*Qodobka 47-aad: Soo Jeedin Mooshin gebagebada Heerka Warbixinta ...... 27*
*Qodobka 48-aad: Akhrinta Saddexaad ee Dooda Wax ka-Beddelid ka dib ...... 28*
*Qodobka 49-aad: Hindise-Sharciyeed Sugaya Saxiix ...... 28*
*Qodobka 50-aad: Hindise sharciyeedka la diiday ...... 28*
*Qodobka 51-aad: Faafinta iyo Xafidaadda Shuruucda ...... 28*
*Qodobka 52-aad: Dhaqangelidda Shuruucda ...... 28*
*Qodobka 53-aad: Durid Sharci ...... 29*

***CUTUBKA 8-AAD: GUDDIYADA GOLAHA WAKIILLADAGALMUDUG ...... 29***
*Qodobka 54-aad: Guddiya Hawleedka Golaha Wakiillada Galmudug ...... 29*
*Qodobka 55-aad: Waajibaadka Shaqo ee Guddiyada Golaha Wakiillada GM ...... 30*
*Qodobka 56-aad: Guddoonka Guddiyada ...... 30*
*Qodobka 57-aad: Kulammada Guddiyada ...... 31*
*Qodobka 58-aad: Ajendaha kulanka Guddiyada ...... 31*
*Qodobka 59-aad: Soo xaadirista kulamada Guddiga ...... 31*
*Qodobka 60-aad: Habka kulamada Guddiyada ...... 32*
*Qodobka 61-aad: Guntanka Kooramka kulan Guddigu ku ansixi karo ...... 32*
*Qodobka 62-aad: Xiriirka guddiyada iyo xukuumadda ...... 32*
*Qodobka 63-aad: Guddi Hoosaadyada Golaha ...... 33*
*Qodobka 64-aad: Qorshe-yaasha Shaqo iyo Qoondeynta Miisaaniyadda Guddiga ...... 33*
*Qodobka 65-aad: Shaqaalaha Guddiyada ...... 34*
*Qodobka 66-aad: Qoraallada Guddiga ...... 34*
*Qodobka 67-aad: Guddiyada Golaha Wakiillada Galmudug ...... 34*

***CUTUBKA 9-AAD: HABRAACA MAALIYADDA ...... 38***
*Qodobka 68-aad: Hab-raaca Ansaxinta Miisaaniyadda DGGM ...... 38*
*Qododka 69-aad: Hab-raaca Ansixinta Kabid Miisaaniyad iyo Wax ka-kaddel Miisaaniyad ...... 39*
*Qodobka 70-aad: Habraaca Ansixinta Warbixinta Xisaab-Xir Sanadeedka Miisaaniyadda DGGM ...... 39*
*Qodobka 71-aad: Habraaca Ansixinta Miisaaniyad-sanadeedka Golaha Wakiillada Galmudug ...... 39*

***CUTUBKA 10-AAD: KORMEERIDA XUKUUMADDA ...... 40***
*Qodobka 72-aad: U Yeeridda Madaxwaynaha iyo ku-xigeenkiisa iyo Wasiirada ...... 40*
*Qodobka 73-aad: Kalsooni-Siinta Xukuumadda ...... 40*
*Qodobka 74-aad: Codka Kalsooni kala Noqoshada Xukuumadda ...... 40*
*Qodobka 75-aad: Soo Jeedinta Kala noqosho Kalsooni ...... 40*
*Qod 76-aad: Su'aal Wadareedka Golaha iyo Xukuumadda ...... 41*
*Qodobka 77-aad: Su'aal oraaheed Xukuumaddu ka Jawaabeyso ...... 41*

***CUTUBKA 11-AAD: QODOBO GUUD OO ISKU JIR AH ...... 42***
*Qodobka 78-aad: Guddiyadda Madaxa bannaan iyo Hay'adaha Madaxa banaan ...... 42*
*Qodobka 79-aad: Maamulka Golaha Wakiillada Galmudug ...... 43*
*Qodobka 80-aad: Ku Dhawaaqida Xaaladaha Degdega ah ...... 43*
*Qodobka 81-aad: Xil-Wareejinta Guddoonka iyo Guddiyada Golaha ...... 43*
*Qodobka 82-aad: Anshaxa Xubnaha Golaha Wakiillada Galmudug ...... 44*
*Qodobka 83-aad: Xeer-Hoosaadka Golaha Wakiillada Galmudug ...... 45*

# CUTUBKA IAAD:
# GOLAHA WAKIILLADA GALMUDUG

## Qodobka 1-aad:
## Golaha Wakiillada Galmudug

1. Golaha Wakiillada Galmudug waa Wakiilka Shacabka Galmudug, waana Awoodda ugu sarreysa ee Sharci-dejinta Dawlad Gobaleedka Galmudug.
2. Golaha Wakiillada Galmudug waxa uu ka koobanyahay **(89)** sagaal iyo sideetan Xubnood, sida ku xusan qodobka 28-aad, faqradiisa 2aad ee dastuurka DGGM.
3. Afka rasmiga ah ee Goluhu waa Af-Soomaali, Afka Carabiguna waa afka labaad.
4. Xarunta Goluhu waa Magaala Madaxda Dawlad Gobaleedka Galmudug ee DhusaMareb sida ku cad Qod.4-aad faqradiisa 1-aad ee dastuurka DGGM.
5. Golaha Wakiillada Galmudug iyo Guddiyadiisa waxa ay fadhiyadooda ku qabsan karaan meel ka baxsan xaruntooda,haddii ay kallifto duruufo gaar ah, sidaasna ay go'aansadaan kadib soo jeedinta Guddoonka Golaha.
6. Muddada Golahu waa **(5)** Shan sano laga bilaabo maalinta lagu dhawaaqo natiijada doorashada si waafaqsan qodobka 32aad ee Dastuurka DGGM

## Qodobka 2-aad:
## Awoodaha Golaha Wakiillada Galmudug

1. Golaha Wakiillada  Waajibaadka Xilkoodu waa:
   a. Diyaarinta, ka doodista iyo Ansaxinta Shuruucda DGGM.
   b. Wax ka beddelidda Dastuurka DGGM marka laga reebo qodobada asaasiga ah ee ku xusan Cutubka kowaad iyo cutubka labaad ee Xorriyaadka iyo Xuquuqaha.
   c. Doorashada iyo Xil ka qaadidda Guddoonka Golaha.
   d. Doorashada iyo Xil ka qaadidda Madaxweynaha iyo ku-xigeenkiisa.
   e. U codeynta Guddiyada Joogtada iyo Kala laabashada Codka.
   f. Ansixinta Barnaamijka iyo Xukuumadda uu soo magacaabay Madaxweynaha Galmudug, Cod hal-dheeri ah
   g. Ka doodista iyo Ansixinta Miisaaniyad Sanadeedka iyo Meelmarinta xisaab-xir Sanadeedka.
   h. Ansaxinta ama laalidda xaaladaha deg dega ah ee Xukuumaddu soo jeedisay
   i. Ka doodista iyo Ansaxinta Hindisa Sharciyeedyada ay Xukuumadu soo qadimto.
   j. Ka doodista iyo Ansaxinta Mooshinada laga keeno Guddoonka Golaha, Madaxweynaha iyo Ku xigeenkiisa.
   k. U codeynta ama Diidmada Ansaxinta dhismaha Deegaanno Cusub.

l. U codeynta ama Diidmada Haya'adaha dawliga Madaxa-bannaan iyo Guddiyada Madaxa-bannaan.

m. La xisaabtanka Xukuumadda, Kormeeridda, Baarista iyo Waydiimaha Xukuumadda iyo Hay'adaha Madaxa-bannaan iyo Gudiyada Madaxa-bannaan.

n. Golaha Wakiilladu waxa uu u yeeri karaa Madaxwaynaha, ku-xigeenkiisa, Xubnaha Golaha Wasiirada iyo Gudoomiye-yaasha Guddiyada Madax-bannaan iyo Xafiisyada kale ee DGGM.

2. Golaha Wakiilladu waxa uu amri karaa baaris lagu sameeyo Hay'ad dawladeed iyaga oo u xilsaaraya Guddi Xildhibaano khibrad u leh hawlaha la baarayo.
3. Golaha Wakiillada ayaa soo saaraya Qaraar ku qeexaya Habraaca Doorashada Xubnaha Aqalka sare ee Jamhuuriyadda Fedaraalka Soomaaliya.

## Qodobka 3-aad:
## Dhaarta Xubnaha Golaha Wakiillada Galmudug

Sida ku cad Qodobka 41aad ee Dastuurka DGGM xubin kasta oo ka mid ah Golaha Wakiillada ka hor inta aysan qaban xilka waxa ay mareysaa dhaarta hoos ku qoran;

**"Waxaan ku dhaaranayaa Magaca Alle in aan xilkeyga u guto si daacad ah oo ay ku jirto danta Dalka, Dadka iyo Diinta, Dhawrana Dastuurka DGMG, kan Qaranka iyo Shuruucda kale ee Dalka u yaal.".**

## CUTUBKA 2-AAD
## ISUGU YEERIDADA XUBNAHA GOLAHA IYO DHISIDA GUDDOONKA GOLAHA WAKIILLADA

### Qodobka 4-aad:
### Guddoomiyaha Ku-Meel-Gaarka ah ee Golaha

Fadhiga ugu horreeya ee Golaha Wakiillada Galmudug, inta laga dooranayo Guddoomiyaha Golaha Wakiillada iyo labadiisa ku-xigeen ee rasmiga ah, waxaa si ku-meel gaar ah u sii Guddoominaya Xildhibaanka ugu da'da weyn Xubnaha Golaha.

### Qodobka 5-aad:
### Doorashada Guddoomiyaha Golaha iyo labadiisa ku xigeen

1. Xildhibaanka ugu da'da weyn Golaha ayaa Shir-guddoominaya Doorashada Guddoomiyaha iyo labadiisa ku-xigeen.
2. Guddoomiyaha iyo ku-xigeenadiisa waxaa Cod qarsoodi, Aqlabiyad ah ku dooranaya xubnaha Golaha Wakiillada Galmudug.
3. Marka ay bannaanaato jagada Guddoomiyaha Golaha, Xilka waxaa sii wadaya ku-xigeennada,Goluhuna Shaqo kale ma qaban karo ilaa uu doorto Guddoomiye, taas oo ku dhaceysa 15 Cisho gudaheed, haddii Kal-fadhiga furan yahay. Haddiise kal-fadhigu xiranyahay, fadhiga ugu horreeya ee kal-fadhiga xiga ayaa lagu dooranayaa.
4. Musharraxiinta u tartameysa xilka Guddomiyaha iyo Guddoomiye ku- xigeennada waa in ay yahiin Xubno ka tirsan Golaha Wakiillada Galmudug.
5. Musharrax kasta waa in uu soo gudbiyaa qoraal muujinaya rabitaankiisa, oo ay la socdaan laba sawir iyo taariikh-nololeedkiisa (C.V).
6. Musharrax kasta waxa uu qoraalkiisa ku soo qeexayaa jagada uu u tartamayo haddii ay tahay tan Guddoomiyaha ama ku-xigeenada (1- & 2aad).
7. Xildhibaan kasta warqadda uu ku soo codeeyo waxa uu ku ridayaa sanduuq marka hore faaruq ah, dushana ka jeexan, gudihiisuna uu muuqdo.
8. Codayntu waxa ay noqonaysaa ilaa seddex (3) wareeg:
   a) Wareega koowaad musharraxii hela codadka aqlabiyadda tirada guud xubnha Golaha Wakiillada ayaa ku guuleysanaya doorashada. Haddii la waayo musharrax hela tiradaas waxaa loo gudbayaa wareega labaad.
   b) Wareega labaad waxaa ka qeyb gelaya afarta musharrax ee hela tirada Codadka ugu badan ee wareegga koowaad. Haddii ay jiraan musharraxiin helay cod is la eg oo

barbar- dhac ah waa kawada qeyb-gelayaan wareega labaad. Muharraxii ku guulaysta codadka aqlabiyadda tirada guud ee xubnha Golaha ayaa ku guuleysanaya doorashada, haddii la waayo waxaa loo gudbayaa wareega seddexaad.

c) Wareega seddexaad waxaa ka qeyb-gelaya labada musharrax ee ugu cododka badan wareega labaad. Haddii uu jiro musharrax seddexaad oo helay tiro la siman mid ka mid ah labada musharrax ee isku soo haray, waxa uu isaguna ka qeyb-gelayaa wareega saddexaad, waxaana doorashada ku guulaysanaya musharraxii hela cod hal dheeri ah ee tirada xubnaha codeeyay.

d) Haddii ay dhacdo in wareega 1-aad ka dib ay isku soo haraan laba musharrax oo kali ah, waxaa si toos ah loogu gudbayaa wareega saddexaad ee ku xusan xarafka (C) ee isla qodobkaan, waxaana meesha ka baxaya wereegii labaad ee ku xusnaa xarafka (B) ee isla qodobkaan. Labada musharrax ee isku soo haray waxa ay ku kala guuleysanayaan cod hal dheeri ah ee tirada xubnaha codeeyay.

e) Marka ay codeyntu dhamaato waxa uu Guddoomiyaha KMG furayaa sanaadiiqda Codeynta, waxaana la tirinayaa codadka, ka dibna waxaa Guddoomiyaha KMG ku dhawaaqayaa ciddii ku guuleysatay jagada Guddoomiyaha Golaha.

9. Ka hor inta uusan xafiiska la wareegin Guddoomiyaha cusub waa in uu ka tago xilka uu ka hayey xisbi-siyaasadeedka uu ka tirsanaa, si uu shaqadiisa ugu guto dhex-dhexaad-nimo.
10. Doorashada Guddoomiye ku-xigeenada waxaa loo marayaa hab-raaca doorashada Guddoomiyaha.

## CUTUBKA 3-AAD:
## GUDDOONKA, HABDHAWRKA IYO GUDDIGA ARRIMAHA GOLAHA

### Qodobka 6-aad:
### Guddoonka iyo Habdhawrka

1. Guddoonka Golaha waxa uu ka kooban yahay;
   a. Guddoomiyaha Golaha Wakiillada Galmudug.
   b. Guddoomiye ku xigeenka Koowaad.
   c. Guddoomiye ku xigeenka Labaad.
2. Habdhawrka Golaha waxa uu ka kooban yahay:
   a. Habdhawraha
   b. Labadiisa ku-xigeen
3. Habdhawraha iyo ku xigeenadiisu waa xubno ka tirsan Golaha waxaana soo Magacaabaya Guddoomiyaha isaga oo la tashanaya ku-xigeenadiisa, kadibna waxaa Ansixinaya Golaha oo ku meel marinaya cod hal dheeri ah tirada xubnaha Golaha oo gacan taag ah, waxaana xilka ka qaadi kara isla Golaha oo ku meel marinaya cod haldheeri ah ka dib markii ay Mooshin ka keenaan 25% ee Xubnaha Golaha.

### Qodobka 7-aad:
### Xilka Guddoomiyaha Golaha Wakiillada Galmudug

Xilka iyo Waajibaadka Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu waa**:**

a. Waxa uu Guddoomiyaa fadhiyada Golaha Wakiillada Galmudug
b. Waxa uu u qeybiyaa doodda xubnaha Golaha Wakiillada
c. Waxa uu ilaaliyaa habsami u socodka shirarka iyo ku dhaqanka Dastuurka iyo Xeer-hoosaadyada Golaha Wakiillada
d. Waxa uu Guddoomaa soona hordhigaa Mooshinada ay soo jeediyaan xubnahaGolaha si waafaqsan Dastuurka iyo Xeer hoosaadyada Golaha
e. Waxa uu ku dhawaaqaa Natiijada kasoo baxda codeynta Golaha Wakiillada
f. Waxa uu sii hayaa Xilka Madaxweynaha xilliga ay Galmudug ka maqan-yihiin Madaxweynaha iyo Ku xigeenkiisa.
g. Haddii Guddoomiyha Goluhu ka maqanyahay kal-fadhiga ama Galmudug, waxaa xilkiisa gudanaya Guddoomiye ku xigeenka 1aad
h. Hadii Guddoomiyaha iyo ku-xigeenka 1aad ka maqanyihii kal-fadhiga ama Galmudug, waxaa xilkooda gudanaya Guddoomiye ku-xigeenka 2aad

i. Waxa uu furaa, xiraana fadhiyada Golaha, waxa uuna sheegaa Saacadaha, Barnamijka iyo Ajandaha fadhiga soo socda oo qoraal ah laguna wargeliyo Golaha Wakiillada.
j. Waxa uu kormeeraa shaqada Hab-dhawre-yaasha iyo Xoghaye-yaasha.
k. Waxa uu Metelaa, kuna hadlaa Magaca Golaha Wakiillada Galmudug si aan ka hor-imaanayn ama aan wax u dhimayn hannaanka Shuruucda iyo Go'aannada Golaha;
l. Waxa uu xiriiriyaa Golaha iyo Baarlamaannada kaleee dalka iyo dunidaba.
m. Waxa uu saxiixaa heshiisyada Goluhu la galo Baarlamaanada iyo Hay'adaha kale ee khuseeya hawlihiisa, ka dibna hor-keenaa Golaha.
n. Waxa uu kala tashan karaa ku-xigeennadiisa Arrimaha Siyaasadda iyo MaamulkaGolaha.
o. Waxa uu Guddoomiyaa Guddiga Joogta ee Arrimaha Golaha
p. Waxa uu kormeeraa Maamulka Golaha iyo habsami u-socodkiisa.

## Qodobka 8-aad:
### Xilka Guddoomiye Ku-xigeennada Golaha Wakiilada Galmudug

1. Guddoomiyaha Golaha Wakiilada Galmudug marka uu ka maqanyahay Galmudug ama uusan qaban-karin xilkiisa, sabab kasta ha ahaatee, waxaa dhammaan hawshiisa fulinaya Guddoomiye ku-xigeenka koowaad. Haddii uu isaguna maqnaado, waxaa hawshiisa qabanaya Guddoomiye ku xigeenka labaad ee Golaha.
2. Haddii ay dhacdo in Guddoomiyaha iyo labadiisa ku xigeen ee Goluhu ay ka maqan yihiin Galmudug ama aysan awoodin in ay soo xaadiraan ama ay guddoomiyaan fadhiyada, waxa ay xubnaha Golaha fadhiya cod hal dheeri ah (50%+1) oo gacan taag ah ku dooranayaan xubin si kumeel gaar ah u Guddoomisa kulankaas.

## Qodobka 9-aad:
### Xil Waayidda Guddoomiyaha Golaha iyo Labadiisa Ku-xigeen

1. Guddoomiyaha Golaha iyo labadiisa ku-xigeen waxa ay xilka ku waayi karaan:
   a) Geeri
   b) Istiqaalo qoraal ah oo uu usoo gudbiyo Golaha ama mid oraah ah oo uu ka sii daayo Warbaahinta
   c) Maqnaansho cudurdaar la'aan ah oo gaaraysa 45 cisho oo isku xigta xilliga uu furanayaha Kafadhiga Goluhu.
   d) Ku xad gudub Shareecada Islaamka, Dastuurka GM, Xeer-Hoosaadka Golaha, ama Shuruucda Dalka.

e) Xil gudasho la'aan joogta ah sida:

i. Dhimmirkiisa oo wax u dhinmaan (Waali), haddii ay soo caddeeyaan Guddi dhakhaatiir la aqoonsanyahay, laguna kalsoonyahay

ii. Caafimaad darro joogta ah ama awood beelid uusan xilka la gudan-karin, haddii ay soo caddeeyaan Guddi dhakhaatiir la aqoonsanyahay, laguna kalsoon-yahay

iii. Muddada Xilkiisa oo dhammaato

iv. Xukun kama danabeys ah oo ay ku riday maxkamad awood u leh, kuna mutaystay xabsi aan ka yarayn lix Bilood (6).

2. Soo jeedin xil ka qaadis Xubnaha Golaha ee Guddoonka Golaha, sababaha ku xusan faqrada 1aad, xarfaheeda c,d,e, ayna soo jeediyaan xildhibaanno aan tiradoodu ka yareyn seddax meelood meel (1/3) tirada guud ee Golaha. Codka xil ka qaadistooduna uu ku ansaxayo aqlabiyad dhan seddax meelood laba (2/3) xubnaha guud ee Golaha.
3. Soo jeedinta xil ka-qaadista Guddoomiyaha iyo ku-xigeenadiisu waa in ay ahaato mid sababeysan kuna saleysan sharciga.
4. Soo jeedinta xil ka-qaadista Guddoonka waxaa laga doodayaa loona codeynayaa (10) cisho oo maalmo shaqo ah gudahood, laga bilaabo taariikhda Mooshinka la keenay Golaha.
5. Haddii Guddoomiyaha ama mid ka mid ah ku-xigeenadiisa uu soo wajaho Mooshinxil-kaqaadis ah, waxaa la marayaa tilaabooyinka soo socda;

a) Guddoomiyaha ama ku-xigeenka laga keenay soo jeedinta xilka-qaadida, waxaa laga wareejinayaa guddoominta fadhiyada looga doodayo soo jeedinta, codayntuna waxa ay noqoneysaa qarsoodi

b) Haddii Guddoomiyaha ama Ku-Xigeenku lumiyo xilka, si waafaqsan qodobka 9aad faqradiisa 2aad ee Xeer-hoosaadkaan, Goluhuwaxa uu Muddo shan iyo toban **(15)** Maalmood gudahood ah ku dooranayaa Guddoomiye ama ku xigeen cusub.

## Qodobka 10-aad:

### Xilka Hab-dhawraha Golaha iyo Ku-xigeenadiisa

Habdhawraha Golaha iyo Ku xigeenadiisa iyaga oo raacaya awaamirta Guddoomiyaha waxa ay u xilsaaran-yihiin;

a) Dhawrista nidaamka Golaha ee;

b) Nabadgelyada, xasiloonida goobta iyo xubnaha Golaha;

c) Kormeerka iyo hubinta dhaqan-galka jadwalka safarrada xubnaha golaha;

d) Kormeerida iyo ilaalinta Hantida Golaha;

e) Kormeeridda xafladaha, dhawrista hab-maamuuska, ilaalinta qaabka fadhiga golaha iyo martida.

f) Wixii kale ee hawl ah ee Guddoonku u xilsaaro.

## Qodobka 11-aad:
## Xilka Xoghayaha Guud ee Golaha.

A. Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada Galmudug waxaa soo magacaabaya Guddomiyaha Golaha, marka uu la tashado ku-xigeennadiisa, waxaana anisixinaya Golaha Wakiillada.

B. Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilladu waxa uu u xilsaaran-yahay:

1. In uu hubiyo in la wargaliyey Xildhibaanada wakhtiyada shirarka iyo kal-fadhiyada Golaha.
2. In uu wargelinta ku diro qoraal, kuna lifaaqo nuqul ajendaha shirka, laguna wargaliyo 24 saac ka hor Xildhibaannada, haddii aan Guddoonku amrin xaalad deg-deg ah.
3. Kormeerka shaqaalaha Golaha marka ay gudanayaan waajibaadka hoos ku qoran:
   a) Diyaarinta iyo u qeybinta qoraalada ay xubnuhu u baahan yihiin ka hor fadhiga.
   b) Hubinta guntanka Kooramka marka uu Guddoonku codsado
   c) Diiwaan-gelinta magacyada Xildhibaanada doonaya in ay ka hadlaan fadhiga iyada oo la tixgelinayo sidii ay usoo kala hor codsadeen.
   d) Hubinta qaadista Maxdarrada (minutes) fadhiga Golaha.
   e) Tirinta codadka ay bixiyaan Xildhibaanadu iyo arrimaha kale ee Goluhu go’aan ka gaaray iyo sixitaanka hadal qoraalada.
   f) Hubinta sax-nimada qoraalada iyo ilaalinta buuga xaadirinta xubnaha Golaha.
   g) Hubinta dhammaan go’aannada iyo xeerarka Goluhu soo saaray in ay leeyihiin raad-raac sax ah, loona diiwaan-geliyo hab sax ah.
4. Waxa uu Guddoomiyaha Golaha la saxiixaa Qoraallada maxdarka fadhiyada Golaha.
5. Xoghayaha Guud ee GWGM waxa uu xilkiisa ku waayi karaa habkii lagu magacaabay.

## Qodobka 12-aad:
## Guddiga Joogta ee Arrimaha Golaha

1. Guddiga Joogtada ee Arrimaha Golaha waxa uu ka koobanyahay; Guddoomiyaha Golaha, labadiisa ku xigeen,habdhawraha iyo labadiisa ku-xigeen, iyo dhammaan Guddoomiye-yaasha Guddiyada GolahaWakiillada Galmudug.
2. Guddoomiyaha Golaha ayaa Guddoominaya Guddiga Joogta ee Arrimaha Golahaah.
3. Xilka iyo waajibaadka Guddiga Joogtada ee Arrimaha Golahaah waa:
   a) Waxa uu diyaariyaa, maamulaa barnaamijyada iyo hawlaha kalfadhiyada Golaha.

b) Waxa uu diyaariyaa, maamulaa jadwal-hawleedka fadhiyada Golaha.

c) Waxa uu usoo gudbiyaa Guddoomiyaha warbixinta wax-qabadka iyo baahida Guddiyada Golaha Wakiillada Galmudug, sidoo kale waxa uu Guddiyada u gudbiyaa qorshe-hawleedka kasoo baxa Guddoonka iyada oo loo marsiinayo Gudoomiye kasta guddigiisa in uu gaarsiiyo go'aanada Guddiga Joogta

d) Waxa uu go'aan ka gaaraa, qeybiyaa Miisaaniyad-sanadeedka shaqo ee Guddiyada Golaha.

e) Waxa uu qorsheeyaa barnaamijyada shaqo ee Guddiyada Golaha sida; socdaalada Guddiyada iyo Kulamada ka baxsan dhismaha Golaha haddii loo baahdo.

f) Waxa uu ka doodaa, go'aanna ka gaaraa warbixinnada guddiyada ee loo gudbinayo Golaha.

## CUTUBKA 4-AAD:
## XUBNAHA GOLAHA WAKIILLADA GALMUDUG

### Qodobka 13-aad:
### Xilka Xubnaha Golaha Wakiillada Galmudug

1. Xubin kasta oo ka mid ah Golaha Wakiillada Galmudug marka ay gudaneyso xilkeeda waa in ay saldhig uga dhigtaa danta guud ee Galmudug oo kali ah.
2. Xubin kasta iyada oo oofinaysa waajibka ku cad faqrada 1aad ee qodobkaan, xil gaar ah ayaa ka saaran Matalaadda deegaan-codbixiye-yaasha laga soo doortay, iyada oo aan loo eegin Siyaasad iyo taageerid Xisbiyo kale.
3. Xilliga fasaxa Kalfadhiyada Xildhibaan kasta ee Golaha waxaa waajib ku ah;

A. in uu fasaxa ku qaato deegaan-doorashadiisa haddii xaalad nabadgelyo aysan saamixi waayin;
B. In uu kulamo guud u qabto bulshada deegaanka, kalana tashado arrimaha hortabina u leh bulshada
C. In uu kala hadlo hormarinta, Nabadda iyo dibu-heshiisiinta Galmudug;
D. In uu u kuur-galo baahiyaha guud iyo gaar ee deegaanka;
E. In uu Golaha usoo gudbiyo warbixin qoraal ah wixii uu kala soo kulmay booqasha-hawleed-kiisii Deegaanka.

### Qodobka 14-aad:
### Xuquuqda Xubnaha Golaha

1. Xuquuqda Gunno ee Xubnaha Golaha waxa ay ka bilaabmeysaa maalinta loo dhaariyo xilka. Waxa ayna kala tahay:

A. Gunno Xileed Bille ah;
B. Gunno Fadhi;
C. Gunno Deegaan;
D. Gunno Caafimaad;
E. Gunno Gaadiid iyo Sahay Safar Shaqo.

2. Qadarka gunnooyinka iyo habraaca loo bixinayo waxaa Goluhu kusoo saarayaa qaraar gaar ah.
3. Xubintii Golaha Wakiillada ee dib loo soo dooran-waayo waxa ay xaq u yeelanaysaa laba bilood oo gunno sagootis ah,waxaana lagu soo saarayaa sharci gaar ah.
4. Xubintii laga qaado xasaanadda waxa ay qaadanaysaa Gunnadeeda oo dhan, balse kama qeyb-galeyo fadhiyada Golaha mana yeelanayso cod, ilaa inta Maxkamadu arrinteeda ka gaareyso xukun kama-dambays ah.
5. Xubnaha Haweenka ee ku jira fasaxa dhalmada waxa ay xaq u leeyihiin in la gaarsiiyo waxbixinta hawlaha Golaha; go'aanada uu gaaro, fadhiyada caadiga iyo kuwa aan caadiga ahayn.

## Qodobka 15-aad:
## Xasaanadda xubnaha Golaha Wakiillada Galmudug

1. Xubnaha Golaha Wakiillada Galmudug waxa ay leeyihiin Xasaanad, sida ku cad qodobka 40-aad ee dastuurka DGGM.
2. Marka Xubin ka tirsan Golaha laga qaadayo Xasaanada waxaa loo baahanyahay oggolaasjaha aqlabiyad hal dheeri ah, tirada guud ee Xubnaha Golaha (50% +1) iyada oo tirada Golaha laga reebayo kuraasta bannaan ee ay sababtay Geeri, tanaasul ama sharci.

## Qodobka 16-aad:
## Xaadirida Fadhiyada Golaha

Xubin kasta oo ka tirsan Golaha waxaa waajib ku ah in ay soo xaadirto fadhiyada Golaha:

1. Xilliga shaqada Golaha waxa uu bilaabmayaa 09:00 Subaxnimo, waxa uuna ku egyahay dhamaadka Ajendaha shaqo ee maalintaas u yaal fadhiga Golaha.
2. In la bilaabo diwaan-gelinta Xildhibaannada **9:00** Subaxnimo
3. In Guddoonku soo fadhiisto halki loogu tala galay **10:00** Subaxnimo, Shirkuna uu furmo
4. Haddii la gaaro **10:30** Subaxnimo waxaa la joojinayaa diwaan-gelinta Xildhibaannada
5. Haddii aan la helin Guntanka Kooramka Guddoonka ayaa dib u dhigaya furitaanka fadhiga Muddo hal saac ah

6. Haddii Guntanka Kooramku buuxsami-waayo Saacaddaas kadib Guddoonka ayaa faddhiga soo xiraya
7. Xubnaha kasoo dib dhaca **10:30** Subaxnimo, waxaa lagu qorayaa liis gaar ah.
8. Soo daahidda shan **(5)** maalmood waxa ay lamid tahay maqnaansho Maalin oo la xisaabinayo dhamaadka kalfadhi kasta
9. Tirada ugu badan ee mar kaliya fasax uga maqnaan-karta Kalfadhiga waa **15** Xildhibaan
10. Fasaxa uu bixiyo Guddoonku hal Kalfadhi kama badnaankaro **30** cisho (teel-teel ama xiriir)
11. Xubintii Golaha ee fasax la'aan ama cudurdaar la'aan ka maqnaato fadhiyada **(3)** maalmood oo isku xiga, waxa ay muteysanaysaa digniin qoraal ah. Haddii ay cudurdaar la'aan maqnaato muddo gaareysa todoba **(7)** Cisho oo xiriir ah ama teel-teel ah, soddon Cisho gudahood, waxaa lagu ganaaxayaa **1/5** Gunnadiisa. Wixii maqnaasho ah ee ka badan muddadaas waxaa loo gudbinayaa Guddoonka Golaha si uu tilaab uga qaado Guddiga Xeer-Hoosaadka, Anshaxa, Xasaanadda & Daryeelku.
12. Haddii Xubintu soo xaadirto billawga fadhiga, kadibna iska baxdo fasax la'aan iyada oo fadhigii weli socdo, waxa ay la mid tahay, lana xukun tahay Xubin ka maqan fadhiga.

## Qodobka 17-aad:
### Labbiska iyo Heybadda Xildhibaanka

Waxaa ka reeban Mudanaha Golaha Wakiillada Galmudug in uu Golaha ku yimaado muuqaal aan ku habboonayn haybaddiisa oo aan waafaqsanayn Shareecadda Islaamka.

## Qodobka 18-aad:
### Waayidda Xubinnimada Golaha Wakiillada Galmudug

Xubinnimada Golaha Wakiillada Galmudug waxaa lagu Lumin karaa;

a) Xubinta oo ay lasoo gudboonaato xaalad xil-gudasho la'aan joogto ah
b) Xubinta oo istiqaalo soo gudbisa, lagana oggolaado
c) Ka- maqnaansho Fadhiyada Golaha laba Kalfadhi oo Xiriir ah iyada oo uusan jirin fasax ama cudurdaar maan-gal ah.
d) Xubinta oo aqbasha xil dawladeed oo aan ahayn Wassiir/ Wasiir-dawle/Wasiir ku xigeen
e) Xubinta oo Geeriyooto.
f) Xubinta oo beesha maskaxda ama uu ku yimaado xanuun aan lala shaqeyn-karin..
g) Xubinta oo la hakiyo Xuquuqdeeda Muwaadnimo si wafaqsan Shuruucda DGGM iyo kuwa dalka.

## CUTUBKA 5-AAD

## MADAXWEYNAHA DGGM IYO KU XIGEENKIISA

### Qodobka 19-aad:

### Doorashada Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa

1. Golaha Wakiillada Galmudug ayaa dooranaya Madaxweynaha Galmudug iyo ku xigeenkiisa:
   a) **15** Maalmood gudahood qabsoomida fadhiga ugu horreeya ee Golaha cusub
   b) **30** Maalmood gudahood, bannaanaanta jagada Madaxweynaha Galmudug
2. Goluhu waxa uu magacaabayaa Guddi doorasho oo ku meel-gaar ah oo hawshiisu tahay; diyaarinta, kormeerka iyo maamulka Doorashada Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa iyo hubinta buuxinta shuruudaha musharraxnimada Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa.
3. Ugu yaraan saddex meelood laba (2/3) tirada guud ee golaha in ay joogaan u codeynta doorashada Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa.
4. Fadhiga Doorashada Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa waxaa Guddoominaya Guddoomiyaha Golaha Wakiillada Galmudug, haddii uu maqan yahay waxaa Guddoominaya ku-xigeenka 1aad ama labaad haddi ku-xigeenka 1aad maqan-yahay.
5. Ka hor doorashada Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa, Guddoomiyaha Golaha ayaa fadhiga Golaha usoo bandhigaya Musharraxiinta xilka Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa Khudbada Barnaamij-kooda.
6. Musharraxiinta jagada Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa waa in ay buuxiyaan shuruudaha ku qeexan qodobka 46-aad ee dastuurka DGGM.
7. Doorashada Madaxwayne ku xigeenka waxaa loo marayaa Habraaca Doorashada Madaxwaynaha sida ku cad Q. 47/5aad ee DDGGM

### Qodobka 20-aad:

### Eedeynta iyo Xil ka Qaadista Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa DGGM

Sida ku cad Qodobka: 52-aad ee dastuurka DGGM eedaynta iyo xil ka qaadista Madaxwaynha iyo ku xigeenkiisa waxaa loo marayaa;

1. Golaha Wakiilada Galmudug ayaa soo jeedin-karaa xil ka qaadista Madaxweynaha ama ku xigeenkiisa marka ay ku sifoobaan ku xad-gudubka dastuurka GM ama shuruucda JFS.
2. Mooshinka laga keenayo Madaxweynaha ama ku xigeenkiisa, waa in ay soo jeediyaan saddex-meelood meel Golaha Wakiillada.

3. Madaxweynaha ama ku xigeenkiisa waxaa xilka looga qaadi karaa saddex meelood laba meel ee Golaha Wakiillada Galmudug marka ay ka codeeyaan.
4. Xil-ka-qaadista Madaxwayne ku xigeenka waxaa loo marayaa Habraaca xil-ka qaadista Madaxwaynaha.

### Qodobka 21-aad:
### Hadal-jeedinta Madaxweynaha ee Golaha Wakiillada Galmudug

Madaxweynaha DGGM waxa uu hadal ka jeedin karaa Golaha Wakiillada Galmudug Munaasabadaha soo socda:

a) Furitaanka Kalfadhiyadda Golaha.
b) Fadhiyo gaar ah ee uu codsado Madaxweynuhu ama uu codsado Guddoonka Goluhu.
c) Waxa uu la hadli karaa Golaha Wakiillada mar kasta ee loo baahdo.

## CUTUBKA 6-AAD:
## KALFADHIYADA IYO FADHIYADA GOLAHA WAKIILLADA GALMUDUG

### Qodobka 22-aad:
### Kalfadhiyada iyo fadhiyada Golaha Wakiillada Galmudug

1. Sida ku xusan qodobka 39 ee dastuurtka DGMG, Golaha Wakiilada Galmudug ayaa Sanadkiiba yeelanaya Saddex kalfadhi oo caadi ah, kalfadhi kasta ee Goluhu waxa uu soconayaa muddo laba bilood ah.
2. Kalfadhiga ugu horreeya ee Golaha Wakiillada waxa uu furmayaa maalinta la dhaariyo Xubnaha Golaha, waxa uuna xirmayaa marka ay u dhamaato muddada labada bilood. Kalfadhiga 2aad ee sanadka waxa uu furmayaa laba bilood kadib marka uu xirmo kalfadhiga hore.
3. Kalfadhi kasta dhammaadkiisa, Goluhu waxa uu qaadanayaa laba bilood oo fasax ah.
4. Hadii sababa jira awgeed, kalfadhiyada ay raaci waayaan habka kor ku xusan, waxaa kalfadhiga laga dhigayaa taariikhda ugu horreysa ee suurta galka ah,
5. Fadhiyada ama kalfadhiyada waxaa ay soconayaan ilaa laga dhammeynayo ajendaha horyaal iyo hindise-sharciyeedyada deg dega ah.
6. Goluhu waxa uu qabsan karaa kalfadhiyo aan caadi ahayn.

## Qodobka 23-aad:
## Kalfadhiyada aan caadiga aheyn ee Golaha

Iyada oo la waafajinayo sida uu qabo qodobka 39-aad, faqradiisa 8-aad ee dastuurka DGGM, Fadhi aan caadi aheyn waxaa isugu yeeri kara:

a. Guddoomiyaha Golaha Wakiillada,
b. Marka uu dalbo Madaxweynaha DGGM, ama
c. Ay dalbadaan saddex meelood meel Golaha Wakiillada

## Qodobka 24-aad:
## Ajendaha Fadhiyada Golaha

1. Guddiga Joogtada ee Arrimaha Golaha waxa uu diyaarinayaa ajendaha fadhiyada soo socda ee Golaha, waxaana loo qeybinayaa xildhibaanada Golaha ugu yaraan 24 saacadood ka hor fadhiga loo dhanyahay.
2. Ajendaha waxaa loo tixgelinayaa in la ansaxiyay, haddii aysan ugu yaraan 10 Xildhibaan bilawga fadhiga u gudbin Guddoomiyaha Golaha Mooshin qoraal ah oo wax lagagabeddelayo ajendaha iyaga oo soo jeedinaya arrin deg-deg ah. Mooshinka waa in ay ku saxiixan-yihiin xubnaha taageeraya.
3. Ajendaha haddii ay codsadaan 10 xildhibaan in wax cusub lagu daro ama wax laga beddelo, Guddoomiyaha ayaa kusoo daraya ajendaha isla fadhigaas haddii ay u codeeyaan (50% +1) tirada fadhida Golaha

## Qodobka 25: aad
### Qaabka ay isugu Xigaan Hawlaha Fadhiga Golaha

Hawlaha Fadhiga Goluhu uu qabanayo, waxa uu u raacayaa nidaamkaan;

a) Guddoomiyaha ayaa shirka furaya, kadib marka uu sheego tirada joogta
b) Akhrinta aayadaha  Quraanka kariimka
c) Ansixinta ajendaha maalintaas
d) Dhaarinta xubnaha cusub haddii ay jiraan
e) Waqtiga Su’aal weydiinta haddii ay jirto
f) Waqtiga Su’aal wadareed haddii ay jirto
g) Soo jeedinta Guddoomiyaha
h) Hindisa sharciyeed maraya akhrinta koowaad.
i) Hindisa sharciyeed maraya akhrinta labaad.
j) Warbixinta Guddiyada

k) Hindisa-sharciyeed maraya akhrinta saddexaad iyo ansixintiisa.

l) Mooshin la keenay haddii uu jiro.

## Qodobka 26-aad:
### Guntanka Kooramka

1. Aqlabiyada tirada guud ee xubnaha Golaha ayaa noqonaya guntanka Kooramka
2. Go'aannada kasoo baxa shirarka Golaha waa sharci haddii guntan uu jiray xilligii codka la qaadayey. Guddomiyaha ayaa xaqiijinaya guntanka Kooramka inta aan codka la qaaadin, isaga ayaana go'aan ka gaaraya goor-walba ee la hubinayo guntanka.
3. Ka hor inta uusan Goluhu codeyn, xubin kasta ee Golaha ka tirsan waxa ay codsan-kartaa in la hubiyo guntanka taas oo Guddoonka ku waajibinaysa in uu hubiyo guntanka.
4. Codbixin kasta oo u baahan tiro cayiman, oo aan ka aheyn kuwa u baahan cod hal dheeri ah ee xubnaha jooga, inta aysan cod bixinta dhicin, Guddoomiyaha ayaa hubinaya in ay fadhiyaan tirada loo baahanyahay ee ay ku ansaxeyso cod bixintaas.
5. Haddii ansixinta Mooshin ama qodob ajendaha ka mid ah uu u baahanyahay tiro saddex meelood laba meel, ugu yaraan sadex meelood laba ee xubnaha Golaha waa in ay xaadir ku yihiin fadhiga codka ka hor.

## Qodobka 27aad:
### Noocyada Codeynta

1. Cod-bixinta Golaha waxa ay u dhaceysaa qaabka soo socda:
   a) Gacan taag
   b) Cod qarsoodi ah
   c) Cod-bixin qoraal ah (Magac u yeerid)
2. Cod-bixinta qarsoodiga waxaa loo sameynayaa sida soo socota:
   a) Guddoomiyaha Golaha waa in uu diyaariyaa sanduuqa cod-bixinta
   b) Guddomiyaha Golaha ayaa u sharraxaya habraaca codeeynta Golaha
   c) Guddoomiyaha Golaha ayaa amraya u yeerista magacyada xubnaha iyo uqeybinta xubnaha xaashida lagu codeeyo.
   d) Guddoomiyaha Golaha ayaa xaqiijinaya xubnaha codeeyey, kuwa ka aamusay iyo kuwa xumaaday, kadibna ku dhawaaqaya natiijada codbixinta.
3. Cod-bixin qoraal ah (magac u yeerid) waxaa la qabanayaa marka ugu yaraan 10 xubnood sidaas codsadaan, Goluhuna go, aan ka qaato. Marka la qaadayo cod-bixin qoraal ah xubin

kasta oo codeysa magaceeda hortiisa ayaa lagu qorayaa codkeeda (haa ama maya) ama maqnaasha-heeda magaceeda oo buuxa.

4. Sharci ahaan haddii codeynta mooshin la hor keenay Golaha uu barbar dhac noqdo, ma meel marayo mooshinkaas, haddiise cod-bixintu ay gacan taag tahay, Guddoomiyaha ayaa codeynaya si uu u kala saaro labada dhinac ee bar-barka noqday
5. Marka laga reebo cod-bixinnada qarsoodiga ah iyo kuwa magac u yeeridda ah, dhammaan cod-bixinnada kale waa gacan tag, loo tirinayo saf-saf
6. Xubnaha jooga fadhiga balse aan ka qeyb qaadan cod-bixinta waxaa loo xisaabinayaa codadka xubnaha aamusay oo kale.
7. Inta looga dhawaaqayo natiijada cod-bixinta, xubin kasta ee golaha ka tirsan looma oggola in ay hadal u jeediso Golaha
8. Haddii la ogaado in uu jiro khalad ku yimid cod-bixinta qarsoodiga ah ama codadka la riday ay ka badan-yihiin tirada xubnaha jooga, Guddoomiyaha ayaa burrinaya natiijada cod-bixinta, isla markiibana qabanaya cod-bixin cusub.
9. Natiijada cod-bixin kasta waxaa ku dhawaaqaya Guddoomiyaha Golaha isaga oo sheegaya tirada codadka oggolaatay ama diiday iyo codadka hallaabay.

## Qodobka28-aad:
### Habka dooda iyo Anshaxa Xubnaha Golaha

1. Xubin kasta oo ka tirsan Golaha waxa ay xaq u leedahay in ay si xor ah u cabirto ra'yigeeda laguna xushmeeyo marka Golaha laga dhex-doodayo.
2. Iyada oo la fulinaayo faqradda kor ku xusan, xubnaha Golaha waa in ay u hoggaan-samaan qodobada soo socda:
   a) In xubin kasta fikirkeeda u cabirto si kooban oo cad iyada oo aan ka-baxayn qodobka laga hadlayo, kuna celcelin erayo isku mid ah, ilaali-sana waqtiga loo xadiday.
   b) Xubin kasta waxaa waajib ku ah in ay run ka sheegto qodobka ay ka hadlayso.
   c) Xubin kasta waxaa waajib ku ah in hadalkeedu uusan kicin xiisad,khalkhalna uusan gelin Golaha iyo shacbkaba Galmudug.
   d) Xubin kasta waa in ay ilaaliso sharafta iyo xasaanada golaha iyo hay'adaha kale.
   e) Xubin kasta soo jeedinteedu waa in ay ku salaysnaato mabaadii'da iyo fikirka uu tageerayo ama ka hor-imaanayo dhawrista xubnaha kale.

f) Xubin kasta oo cabbiraysa fikirkeeda laguma samayn karo dhexgal, gunuunuc, qaylo,sacabin, foori iyo wixii kale ee carqalad ah.
g) Xubina kasta ma hor-keeni karto Golaha ra'yi aan waafaqsanayn ajendaha horyaal fadhiga, haddii uusan oggolaan Guddoomiyuhu.
h) Xubina kasta kama bixi karto fadhiga, ka dib markii ay jeediso fekerkeeda.
i) Xubina kasta kuma qaybin karto dukumiinti aanu u fasaxin Guddoomiyuhu.
j) Xubin kasta waxaa ka reeban in ay qalalaaso ka sameyso agagaarka Golaha
k) Xubin kasta waxaa ka reeban in ay fadhiga ka baxdo marka uu Guddoomiyuhu hadlayo ama ay cod-bixin socoto.
l) Xubin kasta waxaa ka reebban in uu la yimaado, calaamado, qoraallo, islooganno iyo dhawaaqyo muujinaya is-hortaag hawlaha Golaha.
m) Xubin kasta uma tegi karto Guddoomiyaha Xilliga uu guddominayo shirka, waxna uma sheegi karto, xoghaynta kaliya ayaa wixii qoraal ah loo marin-karaa.

3. Xubin kasta oo rabta in ay hadal jeediso waa in ay raacdo tilaabooyinkaan:
   a) Xubin kasta waxa ay ku bilaabaysaa hadalkeeda "Mahadsanid Guddomiye"
   b) Xubin kasta waxa ay isticmaalaysaa "Xildhibaan" marka ay tilmaamayso xubin kale, ama"Mudane/Murwo" marka ay sheegayso qof kale oo madaxda ka mid ah.
   c) Xubin kasta oo rabta in ay hadasho waxa ay taagaysaa gacanta iyada oo aan qaylin, kicin ama ficil kale aan sameyn.
   d) Xubin kasta ma hadli karto, calaamadna kuma muujin karto Ra'yigeeda haddii uusanGuddomiyuhu u oggolaan.
   e) Xubin kasta ee hadasha iyada oo aan Guddomiyuhu u oggolaan waa uu ka joojinayaa hadalka, waxa uuna hadalka siinayaa ciddii kale ee ku xigtay.

## Qodobka 29-aad:
## Hadal jeedinta Xubnaha Golaha

Golaha waxaa hadal-jeedin ku leh:

1. Xubin kasta oo ka tirsan Golaha Wakiillada Galmudug oo is diwaan-gelisay, Guddoomiyuhuna u fasaxay.

2. Xubin kasta oo codsanaysa in la siiyo hadal waa in ay wargelisaa xoghaynta, Guddoomiyaha Golaha ayaana hadalka u siinaya sida ay isugu xigaan.

3. Xubin kasta oo ka tirsan golaha kama haldi karto arrin ku saabsan hal mowduuc in ka badan hal mar, haddii arrintaas aysan aheyn mid shakhsi ah oo isaga saameyneysa, ama la xiriirta xeer hoosaadka ama cadeyn ku saabsan arrin aan hore looga hadlin lana xiriirta mowduucaas.
4. Xubin kasta oo hesha digniin in ka badan laba-jeer digniin in ay ka baxday Mawduuca laga doodayo ama aan hadalkeeda ku dhameysan muddada la siiyey sida ku xusan faqrada2aad, Guddoomiyuhu waxa uu ka joojinayaa hadalka.
5. Haddii si kale uusan u go'aansan Goluhu, hadalka xubinta Goluhu kama badnaan karto shan **(5)** daqiiqo.
6. Ka hadalka dooda ajenduhu kama badnaan-karto Afar **(4)** daqiiqo.
7. Guddoomiyaha Golaha ayaa u oggolaan-kara xubin kasta in ay hadasho waqti ka badan muddada loo cayimay haddii uu u arko macquul.

## Qodobka 30-aad:
## Dhexgal toosineed (Point of Order)

1. Xubin kasta oo ka mid ah Golaha waxa ay codsan kartaa dhexgal toosineed (Point of Order) iyada oo xubna kale ay sii wataan hadalkooda.
2. Guddomiyaha waxa uu siin karaa fursad xubin kasta oo codsata dhexgal toosineed haddii uu u arko in ay tahay sax
3. Marka la aqbalo codsiga dhexgalka toosinteed xubintu waxa ay si toos ugahadlaysaa qodobka ay u istaagtay iyada oo soo koobaysa, kamanahadli karto arin ka baxsan qodobka ay u istaagtay.

## Qodobka 31-aad:
## Xaqa ay xubinta u leedahay Jawaab celin

1. Xubin kasta oo ka mid ah Golaha waxa ay xaq u leedahay in ay jawaab deg-deg ah ka bixiso dood ama hadal lagu xusay magaceeda.
2. Xaqa jawaab celinta ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkaan waxaa lagu xaddidayaa laba (2) daqiiqo kaliya,
3. Haddii xildhibaan isticmaalo xaqa jawaab celinta ee ku xusan qodobkaan waxaa loo oggolyahay xubintii jawaab celinta laga qaatay is-difaacid ku kooban hal daqiiqo.

## Qodobka 32-aad:
## Ka Doodista Hindise Sharciyeed ama Mooshin

Ka doodista hindise-sharciyeed ama mooshin waa in ay u kala horreyso sida soo-socota:

a. Cidda keentay hindise-sharciyeedka ama mooshinka
b. Guddoomiyaha guddiga uu khuseeyo Hindise-sharciyeedku.
c. Guddomiye-yaasha Guddiyadda joogtada ah
d. Haddii aysan xukuumadu keenin hindise-sharciyeedka, Goluhu waxa uu Xukuumada weydiin-karaa aragtideeda ama fikirkeeda
e. Xubnaha kale ee Golaha waxa ay u hadlayaan sida uu u kala siiyo hadalkaGuddoomiyuhu. Kadib marka ay dooda dhamaato, cida keentay hindise-sharciyeedka ama mooshinka waxa ay xaq u leedahay in ay jawaab ka bixiso, kadib Guddoomiyaha Golaha ayaa soo xiraya dooda isaga oo dalbanaya codeynta xubnaha golaha ee ku aadan hindise-sharciyeedka ama mooshinka.

## Qodobka 33-aad:
## Hadal-jeedinta Wasiirada

Fadhi Goluhu u dhanyahay iyo codsi uu oggolaaday Guddoomiyaha Goluhu kadib,Wasiir kasta waxa uu hadal ka jeedin-karaa arrin kasta ee hoos imaaneysa xeen-daabka waajibaadkiisa. Hadal jeedintiisa kadib, Guddoomiyaha Golaha ayaa oggolaanaya fikir ku biirin ama Su'aalaha ay Goluhu u qabaan Wasiirka jeediyay hadalka waxa uuna xaq u leeyahay in uu jawaabo kooban ka yiraahdo ama fikir kale ku biiriyo.

## Qodobka 34-aad:
## Nidaamka Fadhiga Golaha

1. Guddoomiyaha Golaha ayaa ilaalinaya nidaamka Golaha, waxa uuna fari-karaa in xubin kasta ilaaliso nidaamka Golaha ama xubin xukuumadda ka tirsan markii:-
   a. Xubintu hadleyso ayna ka baxdo arrintii doodu u furneyd
   b. Xubintu ay ku kacdo fal carqaladeynaya nidaamka shaqada Golaha
   c. Xubintu ay ku kacdo anshax xumo ama dhaqan aan habboonayn
   d. Xubintu isticmaasho luqad hadal ama qoraal aan ku habboonayn Golaha.
   e. Xubintu ay huriso colaad, isticmaasho luqad ay ku dheehan tahay gef, sharaf-dil, hanjabaad iwm.
   f. Xubintu ay garab marto ama ixtiraami-wayso awoodda xil-gudashada Guddoomiyaha Golaha.

g. Xubintu ay si ula kac ah ku gardarrooto ama hor-istaagto Hab-dhawraha oo fulinaya amarka Guddoomiyaha Golaha.

2. Xubnaha Golaha iyo Wasiiradu marka ay hadal-jeedinayaan waa in ay u hoggaansamaan amarada uu bixiyo Guddoomiyaha Golaha ee ku aadan hab-dhaqanka Xildhibaanka ama Wasiirka ayna raacaan tillaabooyinka soo socda:
   a. Ka noqoshada isticmaalka luqad aan Golaha ku habboonayn
   b. Soo afjarida hadalka markii uu Guddoomiyuhu ka dalbo
   c. Ka saarista fadhiga golaha ama kulanka guddiga inta ka harsan maalintaas.
   d. Laga damiyo telefoonada gacanta waqtiga uu socdo fadhiga Goluhu
   3. Haddii Golaha dhexdiisa ka dhalato nidaam darro weyn, Guddoomiyaha Golaha ayaa dib u dhigaya fadhiga Golaha ilaa maalmaha xiga.

## Qodobka 35-aad:
## Daahfurnaanta Fadhiyada Golaha

1. Fadhiyada Golaha waxa ay u furanyihiin dadweynaha haddii uusan Goluhu si kale u go’aamin.
2. Fadhiyada Golaha waxaa laga baahin karaa warbaahinta iyada oo la tixgelinnayogo’aanka Guddiga Joogtada ee Arrimaha Golaha.
3. Sida ku cad Qod.39-aad ee dastuurka DGGM, dad kale ayaa loo oggolaan karaa in ay ka qeyb-galaan fadhiyada Golaha, waana in la fadhiisiyaa meel khaas ah oo ka soocan kuraasta xubnaha Golaha, waana in ay aamusaan, aysana muujin calaamad aqbalaad ama diidmo ah.
4. Hab-dhawrayaasha ayaa markii uu Guddoomiyahu amro ka dib bannaanka u saaraya cidii u hoggaansami waydo nidaamka Golaha.
5. Dadka loo oggolaaday in ay dhageysataan doodaha Golaha waa in ay haystaan kaarka martida, ayna muujiyaan waqti kasta, lagana arruuriyo dhamaadka fadhiga ka dib ama haddii dibadda loo saaray sida ku xusan farqada 4aad ee qodobkaan.
6. Guddiga Joogtada ee Arrimaha Golaha waxa uu soo saari karaa xeer ku aadan hab-dhaqanka dadweynaha, saxaafadda iyo ciddii kale ee dhagaysanaysa fadhiga Golaha.
7. Guddoomiyaha Golaha ayaa ku amraya ciddii u hoggaansami wayda qodobada xeer-hoosaadkaan in ay ka baxdo dhismaha Golaha, hay’adaha amni-guna fuliyaan amar Guddoomiyaha Golaha.

## Qodobka 36-aad:
### Amniga Golaha Wakiillada Galmudug

1. Waajibaadka Guddoomiyaha Guluhu waa in uu hubiyaa amniga Golaha, kuna amro Hab-dhawraha in uu qaado tillaabooyinka looga baahanyahay amniga Golaha ama lagu xallinayo xaalad amni darro iyada oo la isticmaalayo ciidanka amniga Golaha.
2. Waxaa ka reebban qof-kasta in uu dhismaha Golaha lasoo galo hub iwm.
3. Haddii xubin Golaha ka tirsan uu diido in uu hubka ku wareejiyo ciidamada amniga, hab-dhawre-yaasha ayaa la ogeysiinayaa, haddii xubintu diido amarka hab-dhawraha waxaa loo gudbinayaa Guddoomiyaha si uu tillaab ku habboon uga qaado.
4. Ciidanka amniga ma geli-karo xarunta Golaha haddii uusan Guddoomiyuhu ka codsan in ay soo farageliyaan fadhiga.
5. Cid kale oo aan ka aheyn xubnaha Golaha iyo shaqaalaha maamulka ma geli-karto xarunta Golaha haddii aysan fasax ka haysan Guddoomiyaha.

## Qodobka 37-aad:
### Keydinta iyo Xafidaada Kalfadhiyada Golaha

1. Hadal-qoraalka ayaa noqonaya keydka rasmiga ah ee wax-qabadka Golaha, waxaana mas’uul ka ah Xoghayaha Golaha.
2. Hadal-qoraalada fadhiyada Golaha waxaa saxiixaya Xoghayaha Golaha.
3. Hadal-qoraalada Golaha waxaa lagu xusayaa:
   a. Lambarka fadhiga
   b. Waqtiga iyo goobta fadhiga lagu dhigay
   c. Cidda Guddoomisay fadhiga
   d. Tirada xubnaha kasoo qeyb-gashay fadhiga.
   e. Xubnaha ku maqnaa fasax ay qaateen
   f. Xubnaha ka maqnaa ee aan qaadan fasax
   g. Soo koobidda arimaha laga hadlay iyo go’aamada la qaatay.
   h. Waqtiga la bilaabay iyo waqtiga la xiray fadhiga.
   i. Go’aamada Guddomiyaha ee la xiriira habraaca oggolaashaha soo jeedimada
4. Nuqulka rasmiga ah ee hadal-qoraalka waxaa keydinaya Xoghayaha Golaha.
5. Gebagebada fadhi kasta, hadal-qoraalada ama duubista hadalka iyo dukumiintiyada kale waxaa lagu keydinayaa keydka Golaha iyo bogga internetka Golaha.

## Qodobka 38-aad:
## Xushmada Istaaga iyo Fadhiga Golaha

1. Xubnaha Golaha iyo Hawl-wadeenadu waa in ay istaagaan marka uu soo galo Golaha:
   a. Madaxweynaha JFS.
   b. Guddoomiyaha Golaha Shacabka ama Aqalka Sare ee JFS.
   c. Madaxweynahay DGGM.
   d. Guddoomiyaha GWGM ama sii hayaha xilka Guddoomiyaha
   e. Guddoomiye Barlaamaanada Dawlad Gobaleed kale
2. Fadhiga Golaha, Guddoomiyaha, labadiisa kuxigeen iyo xubin kastaoo Guddoomiyuhu ku marti qaaday fadhiga waxaa la fadhiisinayaa xubnaha hortooda.
3. Hab-dhawraha, ku-xigeennadiisa iyo xoghayaha guud waxa ay fadhiisanayaan meel ka hoosaysa halka uu fadhiyo guddoonku.

# CUTUBKA 7-AAD
# HABRAACA ANSIXINTA SHURUUCDA

## Qodobka 39-aad:
## Curinta Hindise Sharciyeedyada

Hindise-Sharciyeed waxaa soo bandhiggi kara:

1. Golaha Wasiirada DGGM; ama
2. Ugu yaraan 10 Xubnood oo ka tirsan Golaha Wakiillada Galmudug, ama
3. Golaha Wasiirada kaliya Hindise-Sharciyeedka Miisaaniyad-Sanadeedka Galmudug.

## Qodobka 40-aad:
### Soo Bandhigidda Hindise-Sharciyeed

1. Xukuumaddu waxa ay codsan kartaa in lasoo horumariyo shuruuc leh mudnaan gaar ah ama Shuruuc qabyo ah oo loo baahan-yahay dhameystirkeeda.
2. Xukuumaddu waxa ay Hindise-Sharciyeedyo usoo bandhigi kartaa Golaha bisha ugu horreysa ee kalfadhugu furmo.

## Qodobka 41-aad:
### Soo Bandhigidda iyo Akhrinta Hindise-Sharciyeedka

1. Hindise-sharciyeed kasta waa in uu wataa soo jeedin codsi oggolaansho ay ku caddahay tilmaamaha Hindise-Sharciyeedka.
2. Hindise-Sharciyeed kasta waa in loo qeybiyaa xubnaha Golaha ka hor akhrinta 1aad

3. Soo jeedin Mooshin lagu soo bandhigayo hindise-sharciyeed cusub waxa uu ka gudbayaa akhrinta 1aad haddii aan laga keenin dood wax ka-beddelid ah ama su'aalo
4. Hindise-sharciyeed kasta ee la keeno Golaha waa in ay ku lifaaqan-yihiin:
   a. Faahfaahin arrimaha sharcigu xallinayo, ujeedooyinka iyo saameynta sharciga.
   b. Caddeyn saameynta dhaqaale ee sharcigu leeyahay sanadkiisa koowaad.

## Qodobka 42-aad:
### Akhrinta Hindise-Sharciyeedyada Saddex-Jeer

1. Hindise-Sharciyeed kasta waa in laga hor-akhriyaa Golaha Wakiillad Galmudug saddex jeer oo kala duwan ka hor inta uusan Goluhu Ansixin.
2. Akhrinta 1aad waxaa akhrinaya ciddii keentay Hindise-Sharciyeedka, akhrinta 2aad waa warbixinta Guddiga qaabilsan iyo dooda Golaha iyo akhrinta saddexaad oo ah nuqulka Hindise-Sharciyeeedka oo dhammeystiran, kuna jirto tala-soo jeedintii Golaha.
3. Hindise Sharciyeedku marka uu ka gudbo Akhrinta 1aad waxaa loo gudbinayaa Guddiga ay hawhiisu la xiriirto, ka hor inta aan wax ka-beddelid lagu sameyn.
4. Akhrinta 2aad ee Hindise-Sharciyeedka dhinacii soo jeeediyay hindise-sharciyeedka, ha ahaado xubnaha Golaha ama Wasiir, waxaa laga oggolaanayaa ama laga codsan karaa in uu bixiyo faahfaahin dheeraad ah oo qeexaysa qodobada Hindise Sharciyeedka.

## Qodobka 43-aad:
### U-gudbinta Hindise-Sharciyeedka Guddiga u xil-saaraan

1. Markii uu Hindise-sharciyeed kasoo gudbo akhrinta 1aad, waa in loo gudbiyaa Guddiga u-xil-saaran si uu uga tala bixiyo isaga oo la kaashanaya cid walba oo aqoon u leh ama uu quseeyo Hindise Sharciyeedku dibna ugu soo celiyo Golaha
2. Guddiga ayaa Golaha ku wargelinaya wixii soo jeedin wax looga beddelayo Hindise-sharciyeedkii Guddigu soo bandhigay oo ay la socoto warbixin qoraal ah.

## Qodobka 44-aad:
### Soo Celinta Warbixinta Hindise-Sharciyeedka Heerka labaad ah

Warbixinta Guddiyada Goluhu ay ka bixiyeen Hindise-Sharciyeed horay loo gudbiyey lana mariyey akhrinta 2aad, lagama doodi karo saddex maalmood ka hor, laga bilaabo markii loo qeybiyey xubnaha Golaha Wakiillad Galmudug

## Qodobka 45-aad:
## Wax ka-beddelid Hindise-Sharciyeed ka dib soo jeedinta Guddiga

1. Guddoonka Golaha Wakiillada ayaa awood u leh in uu kala qaado ama isku daro talooyinka wax ka-beddelida ama qodobada kala duwan marka lagu guda jiro doodda warbixinta Guddiga, waxaa kale oo uu awood u leeyahay in uu ka codsado xubinta soo jeedisay wax ka-beddelidda in ay ka bixiso faah-faahin kooban.
2. Guddoonku uma soo jeedin karo Golaha qodobo wax ka-beddelid uu horay Guddiga u xil-saaran hindise-sharciyeedku u arkay mid aan waafaqsaneyn sharciga. Hawsha Guddoonkuna waxa ay ku koobantahay qodobada uu Guddiga waqti u waayey.
3. Guddoomiyuhu waxa uu Golaha u soo bandhigi karaa si looga dodo soo jeedin wax ka-beddelid horay ay u diideen guddiga u xil saarnaa, haddii uu u arko mid muhimmadeeda leh, mudanna in tix gelin dheeraad ah la siiyo.
4. Guddoonka ma aqbali karo codsi dood gelin wax ka-beddelid la xiriirta qas iyo isku dir ujeedada laga leeyahay ay tahay in si macno darro ah loo dheereeyo dooda iyo Warbixinta Guddiga.

## Qodobka 46-aad:
## Habka Dooda Wax-ka-Bedelidda Hindise-Sharciyeed

1. Soo jeedin kasta oo wax ka-beddelideedu waafaqsantahay Xeer-Hoosadkaan waa laga doodi kara waxna waa laga baddeli karaa
2. Haddii la oggolaado dooda warbixinta Guddiga, xubin kasta waxaa loo oggolaanayaa in ay hadasho mar-qura, waqti aan ka badneyn **5** daqiiqado iyada oo xaq u yeelaneysa soo jeedin wax ka-bedelid kasta ee ku jirta warbixinta Guddiga.
3. Dooda wax ka-beddelida hindise-sharciyeedka dib ayaa loo dhigi karaa muddo asbuuc ah haddii ay codsadaan ugu yaraan **10** xubnood oo ka duwan xubnihii soobandhigay wax ka-beddelidda.

## Qodobka 47-aad:
## Soo Jeedin Mooshin gebagebada Heerka Warbixinta

Marka lasoo afjaro ka doodista hindise-sharciyeed laba jeer akhris maray, waxaa la soo jeedin karaa Mooshin lagu oggolaanayo wax ka-beddel hindise-sharciyeedka ama sidiisa loo qaato.

## Qodobka 48-aad:
## Akhrinta Saddexaad ee Dooda Wax ka-Beddelid ka dib

1. Marka Hindise-Sharciyeedka ka gudbo akhrinta sedexaad Qodobada la doonayo in wax laga beddelo waa in lagu wargeliyo Guddoomiyaha Golaha iyada oo qoraal ah, kuna saxiixan-yihiin ugu yaraan **10** Xubnood, ka hor **24** saac inta aan la ansixin.
2. Wixii soo jeedin wax ka-beddelid ah ee ku saabsan Hindise-Sharciyeed la hor keenay Golaha waa in loo qeybiyaa xubnaha Golaha iyada oo qoraal ah.
3. Haddii Guddoonka Golaha Wakiilladu u arko in waxka-beddelidu aysan waafaqsaneyn sharciga waa in lagu celiyaa xubnihii soo bandhigay.

## Qodobka 49-aad:
## Hindise-Sharciyeed Sugaya Saxiix

Hindise-Sharciyeed kasta waxa uu sharci noqonayaa marka uu maro habraaca sharci-dejinta ee ku xusan xeer-hoosaadkaan, kadibna uu saxiixo Madaxweynaha DGGM, laguna soo saaro faafinta rasmiga ee DGGM.

## Qodobka 50-aad:
## Hindise sharciyeedka la diiday

Haddii Golaha Wakiilladu diido hindise-sharciyeed,laguma soo celinkaro Golaha muddo **30** malmood ah laga bilaabo maalinta la diiday, sida ku xusan Qod.35aad faqradiisa 2aad ee Dastuurka DGGM.

## Qodobka 51-aad:
## Faafinta iyo Xafidaadda Shuruucda

Kaydka Shuruucda DGGM iyo Faafintooda waxaa Mas'uul ka ah Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada iyo Garyaqaanka Guud ee DGGM oo faafinta rasmiga ah kusoo saaraya, sida ku cad Qodobka 34-aad ee Dastuurka DGGM.

## Qodobka 52-aad:
## Dhaqangelidda Shuruucda

1. Sida ku cad Qodobka 35aad ee Dastuurka DGGM, Hindise-Sharciyeed qabyo ah waxa uu dhaqan-gelayaa marka uu maro habraaca sharci-dejinta, Madaxweynaha DGGM saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga
2. Madaxwaynaha DGGM waa in uu ku saxiixaa ama dib ugu soo celiyaa Golaha isaga oo sababaynaya Hindise-Sharciyeed soo maray Habraaca Golaha muddo aan ka badnayn **30** Maalmo shaqo ah oo la codsan-karo kordhinteeda hal mar.

3. Haddii Madaxwaynuhu soo celiyo Hindise-Sharciyeed waxaa lagu meel-marin karaa 2/3 tirada guud ee Golaha iyada oo aan waxba laga beddelin, haddii uu ka aamuso soona codsan kordhin waafaqsan faqrada 1aad ee qodobkaan waxa uu ku dhaqan-gelayaa Hindisuhu awood Qaanuuneed.

## Qodobka 53-aad:
## Durid Sharci

1. Sharci maray habraaca ansixinta shuruucda iyo dhaqan-gelidda waxaa lagu duri karaa oo keliya in uu kasoo horjeedo Dastuurka.
2. Sharci maray shuruudaha ku xusan Qodobada xeer-hoosaadkaan waxaa duri kara:
   a. Saddex meelood meel ka mid ah xildhibaannada Golaha Wakiillada
   b. Golaha Wasiirrada DGGM;
   c. Ugu yaraan laba Kun **(2,000)** oo cod bixiye oo diiwaan-gashan.
3. Duridda sharci si waafaqsan faqradaha 1aad iyo 2aad ee qodobkaan waxaa la horgeynayaa go'aanna ka gaari kara Maxkamadda Sare ee DGGM oo keliya
4. Habraaca loo marayo duridda iyo go'aan-ka-gaarista waxaa lagu qeexayaa nidaamka garsoorka Galmudug.

# CUTUBKA 8-AAD:
# GUDDIYADA GOLAHA WAKIILLADA GALMUDUG

## Qodobka 54-aad:
## Guddiya Hawleedka Golaha Wakiillada Galmudug

1. Gudashada Waajibaadka Sharciyeed ee Golaha Wakiillada Galmudug waxa uu ku gutaa hannaanka Guddiyada Joogtada ee Arrimaha Golaha
2. Golaha Wakiilladu waxa uu dhisaa, oggolaadaa guddiyo hawleedyo Joogta ah oo uu ku guto waajibkiisa dastuuriga ah, kuna qeexan xeerkaan waajibaadkooda shaqo.
3. Guddoomiyaha Golaha ayaa soo jeediya isaga oo la tashanaya ku xigeennadiisa.
4. Golaha Wakiillada ayaa cod aqlabiyad hal-dheeri ah ku ansixiya Guddiyada hawlaha Golaha, marka uu soo jeediyo Guddoomiyaha Goluhu.
5. Guddomiyaha Golaha isaga oo la tashanaya ku xigeennadiisa, waxa uu magacaabayaa guddiyo u xilsaaran in ay qabtaan hawlo gaar ah, warbixintoodana u soo gudbiyaan Guddoomiyaha.

6. Haddii hal shaqo ay ka wada dhaxayso dhawr guddi, waxa ay isku waafaqaan waqti xaddidan, haddii ay ku heshiin waayaan waqti-xaddidan.waxaa waqti u go’aaminaya Guddoomiyaha, isaga oo sidaas ku wargalinaya Guddiyada.

## Qodobka 55-aad:
## Waajibaadka Shaqo ee Guddiyada Golaha Wakiillada Galmudug

Waajibaadka Shaqo ee Guddiyada Golaha Wakiillada, marka lagu daro shaqooyinka u gaaka ah ee xeer-hoosaadkani farayo, waxa ay ahaanaysaa sidaan:

a. In ay fuliyaan shaqo kasta oo uu Golaha Wakiillada Galmudug u xilsaaro,
b. In ay baaraan, kana doodaan, talana ka soo bixiyaan Shuruucda qabyada ah ee la hor keeno Golaha
c. In ay keenaan sharci kasta oo qabyo ah ama qaraaro qabyo ah oo ku saabsan danta guud ee Galmudug, marka laga reebo hindise-sharciyeed la xiriira miisaaniyad-sanadeedka Galmudug, kadib markii ay isku raacaan ugu yaraan**10** xubnood ee Golaha.
d. In ay Golaha Wakiilladu usoo jeediyaan shuruuc ay tahay in xukuumada la faro in ay kalfadhiga keento.
e. In ay baaraan, kormeeraan, talana kasoo bixiyaan siyaasadaha saameynta ku leh Wasaaradaha ay guddiyada shaqadu kala dhaxeyso.
f. In ay soo jeediyaan ajandooyin Goluhu ka yeesho dood oo faa'iido ugu jirto Galmudug.
g. In ay qiimeeyaan, kormeeraan habka loo qabto iyo habka loo hirgeliyo sharciyada iyo qorsheyaasha xukuumadda iyo hay'adaha dawladda.
h. In ay sameeyaan dadaal kasta oo ay ku kasbanayaan bulshada Galmudug.
i. In ay Golaha Wakiillada Galmudug ku wargeliyaan shaqooyinkooda.

## Qodobka 56-aad:
## Guddoonka Guddiyada

1. Guddi kasta ee Golaha Wakiillada Galmudug waxa uu yeelanayaa Guddoomiye, Guddoomiye ku xigeen iyo Xoghaye oo ah hoggaanka guddi kasta.
2. Xubin kasta oo ka mid ah guddoonka guddiga waxaa laga dhex-dooranayaa xubnaha guddiga, waxaana lagu dooranayaa cod aqlabiyad ah ee xubnaha guddiga.
3. Gudoomiyaha guddiga ayaa saxiixaya go'aanada guddiga
4. Haddi guddoomiyaha guddiga uu soo gudbiyo istiqaalo qoraal ah, ama uu geeriyoodo,ama ay ku timaado xil-gudasho la,aan joogto ah ama uu si joogto ah uga maqnaado kulammada guddiiga, guddigu waxa uu arrinkaas ku wargalinayaa Guddoomiyaha Golaha si ay u doortaan Guddoomiye cusub,

5. faqradda 4aad ee qodobkaan, waxa uu saameynayaa G/ ku-xigeenka iyo Xoghayaha

## Qodobka 57-aad:
## Kulammada Guddiyada

1. Guddiyadu waa in ay si joogto ah u kulmaan ugu yaraan laba jeer bishiiba, waqtiyada lagu jiro kalfadhiyada Golaha Wakiillada, waqtiyada kulammada waxaa goynaya guddoomiyaha, waxaana tala ka soo jeedin-kara Guddoomiyaha Golaha.
2. Guddi kasta waa u kulmi karaa hawshiisa xitaa haddii kalfadhigu xiranyahay
3. Guddigu kulan kale ma yeelan karo marka uu socdo kulanka guud ee Golaha, haddii uusan helin oggolaanshaha Guddoomiyaha Golaha.
4. Kadib markii uu guddoomiyaha guddigu amro, xoghayaha guddiga ayaa ogaysiin-siinaya xubnaha guddiga ka hor **24** saacadood kulanka, kuna cadyahay ajendaha shirka, waqtiga iyo goobta kulanka.
5. Xaghayuhu waa in uu Guddomiyaha Golaha shir walba ee Guddigu leeyahay Og siiyaa;.
6. Guddoomiyaha guddigu waa in uu siiyaa xubin kasta qoraalka ajendaha kulanka.
7. Haddii ajendaha kulanka uu quseeyo wasaarad, waa in Guddoomiyuhu xaqiijiyo in wasaarada la gaarsiiyay ogaysiin ugu yaraan **24** saacadood ka hor, haddii guddigu uusan go'aansan si kale.

## Qodobka 58-aad:
## Ajendaha kulanka Guddiyada

1. Guddoomiyaha guddiga isaga oo la tashanaya xubnaha guddiga ayaa go'aaminaya ajendaha kulanka isaga oo tixraacaya qorshaha shaqo eeguddiga iyo kan Golaha.
2. Gebagebada kulan kasta ee guddigu yeesho, waa in dooda mixdar laga diyaariyo.
3. Guddigu waxa uu ajendaha ku baddeli karaa cod aqlabiyad ah.

## Qodobka 59-aad:
## Soo xaadirista kulamada Guddiga

1. Xubin kasta oo aan fasax ka helin Guddoomiyaha Guddiga iyo Guddoomiyaha Golaha oo ka maqnaada lix kulan oo isku xigta ama muddo ka badan laba bilood waxaa xubintaas loo gudbinaya Guddiga Xeer Hoosaadka Golaha.
2. Haddii ku xigeenka guddoomiyaha gudiga iyo xoghayuhu iyaga oo aan oggolaansho ka haysan guddoomiyaha golaha ama guddoomiyaha guddiga ay ka maqnaadaan afar kulan oo isku xigta ama waqti kabadan laba biloood waxaa loo gudbinayaa Guddiga Xeer Hoosaadka Golaha .

3. Haddii gudoomiyaha guddigu isaga oo aan ka haysan oggolaansho guddoomiyaha Golaha uu ka maqnaado afar kulan oo isku xigta ama waqti ka badan laba bilood waxa uu weynayaa xilkii guddoomiye-nimada.

## Qodobka 60-aad:
## Habka kulamada Guddiyada

1. Kulamada guddiyada waa in uu guddoomiyo guddoomiyaha guddigu
2. Haddii guddoomiyaha guddigu maqanyahay, ku xigeenka ayaa guddoominaya.
3. Guddoomiyuhu waa in uu maamulaa doodaha guddiga, isaga oo xaqiijinaya qof kasta in uu ka hadlay ajandaha si waafaqsan xeer-hoosaadka Golaha.
4. Guddoomiyuhu waa in uu u oggolaado xubnaha in ay u hadlaan sida ay u kala horreeyen
5. Haddii nidaamka kulanka aan la ilaalin, guddoomiyuhu waxaa uu joojin karaa kulanka.
6. Xoghayah Guddiga ayaa ka mas’uul ah qaadista qoraallada kulanka iyo xifdintooda.

## Qodobka 61-aad:
## Guntanka Kooramka kulanka Guddigu ku ansixi karo

1. Inta badan ee xubnaha Guddiga ayaa ah kooramka Guddi kasta
2. Waxaa waajib ah in kooramka guddigu uu dhan yahay marka guddigu gaarayo go’aan
3. Go’aanada guddiga waxaa lagu gaarayaa cod aqlabiyad hal dheeri ah tirada joogta.
4. Haddii codku uu nodqo bar-bar dhac halka guddoomiyuhu codkiisu raaco ayaa ansax ah.
5. Xubnaha guddigu waxa ay ku codeynayaan gacantaag, tirada codadkana waa in lagu qoraa hadal-qoraalka kulanka guddiga.
6. Xoghayaha guddiga ayaa u diraya go’aamada guddigga Guddoomiya Golaha ama Xoghayha guu ee Golaha.

## Qodobka 62-aad:
## Xiriirka guddiyada iyo xukuumadda

1. Wada-shaqaynta guddiyada Golaha Wakiillada iyo Xukuumaddu waxa ay ku dhisantahay mabda’a is-tixgalinta iyo isla-xisaabtanka
2. Waa in ay yeeshaan kulamo joogto ah guddiga iyo wasiirradu ugu yaraan halmar labadii bilba, si wasiirradu guddiga ula socodsiiyaan hawsha wasaarada.
3. Bilowga sannad kasta guddi kasta waxa uu ka doonayaa wasaarada shaqadu kala dhaxeyso ama ha’ayadaha kale in ay usoo gudbiso guddiga barnaamijyada shaqo, hindise-sharciyeedyada iyo ujeedooyinka ay tahay in lagu guuleysto sannadkaas.
4. Guddi kastaa waa in uu kormeeraa lana socdaa hirgelinta barnaamijyada shaqo ee Wasaaradu waddo sanad kasta.

5. Iyada oo Sharciga la raacayo waxa uu Guddigu weydiisan karaa Wasaaradda ama Hay'ada ay shaqadu kala dhaxeyso in ay siiso guddiga faah-faahin ama warbixin qoraal ah ee guddigu uga baahanyahay in uu ku guto shaqadiisa.

## Qodobka 63-aad:
## Guddi Hoosaadyada Golaha

1. Guddi Hawleed Joogta kasta waxa uu sameysan-karaa guddi-hoosaad, marka uu u arko in ay u tahay muhiim, una fududayn-karto hawshiisa.
2. Guddi-hoosaad kasta waxa uu fulinayaa waajibaadka uu faro Guddigiisu kaliya.
3. Xubnaha Guddi-hoosaadku waa xubno ka mida Guddiga Joogtada ee Arrimah Golaha.
4. Marka guddi-hoosaad loo xilsaaray arrin cayiman fuliyo, jiritaankiisu wuu dhamaanaya.
5. Guddi-hoosaadku awood uma laha in uu toos ugu gudbiyo Golaha Warbixintiisa.
6. Guddi-hoosaad kama garab furi karo kulan iyada oo uu socdo kulanka guddigiisa.

## Qodobka 64-aad:
## Qorshe-yaasha Shaqo iyo Qoondeynta Miisaaniyadda Guddiyada

1. Guddoomiyaha Guddigu isaga oo la tashanaya xubnaha guddiga waxa uu diyaarinayaa bilawga sanad kasta qorshaha shaqo ee Guddiga, ayna ansixiyaan xubnaha guddigu.
2. Guddigu waxa uu qiimeeyaa qorshaha shaqo ee wasaaradda shaqadu kala dhaxeyso labadii biloodba mar si ay ula socdaan dhamaan hawlaha wasaaradda iyo shaqadeeda.
3. Guddi kasta waa in awood loo siiyaa in ay u safri karaan meelo ka baxsan xarunta Golaha, haddii ay uga xirantahay hawlo muhiim ah oo la xiriira shaqadooda.
4. Xoghayaha guddiga ayaa uu u xilsaaran diyaarinta safarrada guddiga isaga oo la tashanaya Guddoomiyaha Guddiga.
5. Gudoomiyaha Guddi kasta, isaga oo la tashanaya xubnaha guddiga, waxa uu diyaariyaa Miisaaniyadda sanadka soo socda ee Guddiga oo ku saleysan qorshahooda shaqo, una gudbiyaa xafiiska Guddiga Maamulka ee Golaha si loo ansixiyo.
6. Kharashaadka guddigu waa in aysan ka hor imaanayn xadeynta cayiman ee Golaha.
7. Codsiga oggolaashaha safarada Guddiga waa in hab qoraal ah loogu soo gudbiyaa Xafiiska Guddoomiyaha Golaha, laguna caddeeyaa:-
    a. Ujeedada safarka
    b. Taariikhda la safrayo
    c. meelaha loo safrayo
    d. Magacyada xubnaha la doonayo in loo oggolaado safarka
    e. Qiimaha uu ku kacayo safarku.

8. Guddig kasta oo safra waa in uu soo diyaariyo, una soo gudbiyo Golaha warbixin qoraal ah oo dhammeystiran.

## Qodobka 65-aad:
## Shaqaalaha Guddiyada

1. Golaha Wakiillada Galmudug waxa uu siinayaa guddiyada Joogtada shaqaale maamul iyo mid farsamo.
2. Shaqaalaha taageerada ee lagu kabay guddiga waxaa kormeeraya Xoghayaha.

## Qodobka 66-aad:
## Qoraallada Guddiga

1. Qoraallada Golaha ee khuseeya xeerarka lagu sameeyay is-beddello waxa ay saameyn ku yeelanayaan qoraallada Guddiyada.
2. Hadal qoraalka shirarka Guddiyada waa in loo qoraa hab la mid ah kuwa Golaha, waana in lagu xusaa:
   a. Haddii shirku uu ahaa mid furan ama mid xiran
   b. Magacyada shaqaalaha goob-joog ka ahaa
   c. Magacyada ka qeyb-galayaasha shirka xubnaha ama marti kale.
3. Hadal qoraalka waa in ay ku saxiixanyihiin xoghayaha iyo xogheynta guddiga.
4. Warbixinta Guddiga ee loo gudbinayo Golaha waa in ay noqotaa mid kooban oo ah hal bog oo daabacan.

## Qodobka 67-aad:
## Guddiyada Golaha Wakiillada Galmudug

**1. Guddiga Joogtada ee Arrimaha Golaha**

1. Guddiga Joogtada eeArrimaha Golahu waxa uu ka koobanyahay:
   a. Guddoomiyaha Golaha, labadiisa ku xigeen,
   b. Habdhawraha iyo labadiisa ku-xigeen, iyo
   c. Dhammaan Guddoomiye-yaasha Guddiyadda Goalaha Wakiillada.
2. Guddoomiyaha Golaha ayaa Guddoominaya Guddiga Joogta ee Arrimaha Golahaah.
3. Xilka iyo Waajibaadka Guddiga Joogta ee Arrimaha Golahaah waa sidaan:
   i. Waxa uu diyaariyaa, maamulaa barnaamijyada kalfadhiyada Golaha;
   ii. Waxa uu diyaariyaa, maamulaa Jadwal-Hawleedka fadhiyada Golaha.
   iii. Waxa uu xiriiriyaa hawlaha Golaha iyo Guddiyada Golaha;
   iv. Waxa uu go'aamiyaa Miisaaniyad-sanadeedka shaqo ee Guddiyada Golaha;

v. Waxa uu qorsheeyaa, qiimeeyaa barnaamijyada shaqo ee guddiyada Golaha.

vi. Waxa uu ka doodaa, go'aamiyaa, gudbiyaa warbixinta guddiyada Golaha.

**2. Guddiga Xeer-Hoosaadka, Xasaanadda, Anshaxa iyo daryeelka**

Hawlaha Guddiga Xeer-Hoosaadka, Xasaanadda, Anshaxa iyo Daryeelku waa:

a) Guddigu bilawga kal-fadhi kasta ee Golaha, waxa uu diyaariyaa Hindisaha wax ka-beddelka xeer-hoosaadka Golaha waxa uuna u gudbiyaa Golaha si uu u ansaxiyo;

b) Guddigu waxa uu ilaaliyaa arrimaha la xariira xasaanadda xubnaha Golaha

c) Guddigu waxa uu talo ka bixiyaa fulinta qodobada luminta xubin-nimada Golaha.

d) Guddigu waxa uu talo ka bixiyaa ku dhaqanka xubnaha ee Xeer-hoosaadka Golaha.

e) Guddigu waxa uu soo jeediyaa tillaabooyin lagula xisaabtamayo xubnaha ku xad-gudba hab-dhaqanka iyo anshaxa xubnaha Golaha ee dastuurka iyo xeer-hoosaadka Golaha.

f) Guddigu waxa uu soo bandhigaa wadiiqooyin lagu daryeelayo xubnaha Golaha.

**3. Guddiga Dastuurka, Arimaha Gudaha iyo dib u heshiisiinta.**

Guddigaan waxa uu u xilsaaranyahay Arrimaha soo socda;

a. Soo jeedinta wax ka-beddelka Dastuurka DGGM;

b. Abaabulka hawlaha dib u heshiisiinta iyo is dhex-galka bulshada Galmudug iyo ka digidda dhibka colaadaha ee deegaanada Galmudug;

c. Xoojinta iyo gacan siinta hawlaha arimaha Gudaha, federaaleynta iyo dawlad-dhiska.

**4. Guddiga Garsoorka, Awqaafta iyo Arrimaha Diinta**

Guddiga Garsoorka, Awqaafta iyo Arimaha Diinta waxa uu u xilsaaranyahay;

A. Arimaha Garsoorka:

i. Hubinta madaxbannanida Garsoorka.

ii. Ka baaraandega shuruucda hay'adaha Garsoorka iyo Garsooreyaasha

iii. La socodka cabashooyinka bulshada ee arimaha garsoorka

iv. La socdka arrimaha Xabsiyada iyo Maamulkooda

B. Arimaha Diinta & Awqaafta:

i. Ka talabixinta iyo u kuur-galka arrimaha faafinta diinta Islaamka.

ii. Ka tala-bixinta hawlaha Maamulka Masaajidda, Xajka, Cumarada iyo hawlaha kheyriga

**5. Guddiga Arrimaha Bulshada**

Guddiga Arrimaha Bulshadu waxa uu u xilsaaranyahay hawlaha:

- Caafimaadka

- Waxbarashada
- Shaqada iyo Shaqaalaha
- Dhaliyarada iyo Isbortiska
- Isgaarsiinta iyo Warbaahinta
- Ka baaraandegga iyo ka-talabixinta Shuruucda la xiriirta waajibaadkooda sida:
  a) Caafimaadka bulshada, Siyaasada caafimaadka, Daryeeelka iyo caymiska caafimaad
  b) Waxbarashada hoose iyo tan sare, Tababarka xirfadaha iyo waxbarashada aan rasmiga aheyn, Sayniska & Arrimaha Tiknoolajiyada
  c) Arrimaha shaqada, Shaqaalaha iyo Ururada Bulshada
  d) Arrimaha horumarinta dhalinyarada iyo Arrimaha Isboortiga
  e) Warfaafinta iyo wacyigalinta, Siyaasada warbaahinta , Xuquuqda daabacaada iyo fikirka.

**6. Guddiga Beeraha, kheyraadka iyo Bay'ada**

Guddigaan waxaa hoos immaanaya:

- Beeraha & Siyaasadda Dhulka
- Horumarinta Reer-miyiga, Xannanada Xoolaha, Dhirta & Daaqa
- Kheeraadka Badda
- Macdanta, Biyaha iyo Shidaalka
- Bay'dda iyo Ilaalinta Duurjoogta
- Ka baaraandegista iyo ka-talabixinta shuruucda la xiriirta hawshooda sida:
  a) Dalagga, Dhul-Beereedka, Waraabka iwm
  b) Kalluunka iyo kheyraadka badda iwm.
  c) Hormarinta Reer miyiga, Xannanada Xoolaha iwm.
  d) Ilaalinta bii'ada; bad, berri iyo hawada sare, Shidaalka, Kheyraadka macdanta & Biyaha.

**7. Guddiga Maaliyadda, Ganacsiga & Warshadaha**

Guddiga Maaliyadda, Ganacsiga & Warshadaha Arrimaha hoosyimaad waxaa ka mid ah;

a) u kuurgelidda iyo ka tala bixinta Siyaasadaha horumarinta dhaqaalaha iyo Gancsiga

b) Ka talbixinta Siyaasadaha Horumarinta Warshadaha yio wax soo saarka

c) U Kuur-galka shuruucda ilaalinta xuquuqda gaarka ah ee ganacsiga

d) Ka talabixinta shuruucda ilaalinta tayada ganacsiga la soo waarido (quality control)

e) U soo jeedinta xukuumadda ku talagalka Miisaaniyad-sanadeed kasta.

f) Ka hawlgalka Hindise-sharciyeedyada ArimahaMisaaniyadda;

g) Ka baaraan-dega kharash-miisaaniyadeedka hay'adaha DGGM.

h) U kuur-galka iyo tala ka bixinta siyaasadda canshuuraha iyo dakhliga DGGM.

i) Tala ka bixinta hindise-sharciyeedyada arimaha qorsheynta & tirakoobka

j) Ka baaraan-daga iyo hubinta warbixinta hanti-dhawrka guud ee DGGM

k) La socodka hindise-sharciyeedyada arimaha la- xisaabtanka hay’adaha dawladda

**8. Guddiga Hawlah Guud, Waddooyinka iyo Dekedaha**

Guddigaan waxa uu u xilsaaranyahay;

A. Waddooyinka iyo Gaadiidka Dhulka

B. Dekedaha & Gaadiika Badda

C. Garoomada & Gaadiidka Cirka

Ka baaraandegista iyo ka-talabixinta shuruucda la xiriirta hawshooda sida;

a) Dhismaha iyo ilaalinta Waddooyinka,

b) Ilaalinta Dhismayasha Dawlada,

c) Maamulka Garoomada iyo Dekadaha

d) Maamulka Gaadiidka noocyadiisa kala duwan

**9. Guddiga Haweenka, Xuquuqul insaanka iyo Arrimaha Bani'aadanimada**

Guddiga Haweenka, Xuquuqul Insaanka, iyo Bani'aadanimada waxaa hoos imaanaya:

A. Arrimaha Xuquuqul Insaanka

B. Haweenka iyo Arrimaha Qoyska

C. Arimaha Bani'aadanimadda iyo Barakacayaasha Hawlahiisuna waa:

Ka baaraandegista iyo ka-talabixinta shuruucda la xiriirta arrimaha;

a) Xuquuqul insaanka, Naafada iyo Curyaamiinta, Ilaalinta xuquuqda dhallaanka

b) Ilaalinta Xuquuqda Haweenka iyo daryeelkooda

c) La socodka Barakacayaasha Gudaha iyo daryeelkooda, abaaraha iyo masiibooyinka.

**10. Guddiga Xuduudaha iyo Amniga**

Guddigaan Hawlihiisa waxaa ka mid ah;

a. La socodka arrimaha Ciidamada iyo Hay' adaha Amniga
b. La socodka amniga guud iyo xasiloonida DGGM
c. La socodka Arrimaha Xuduudaha Dawlad Gobaleedka Galmudug.
d. La socodka iyo ka tala bixinta Shuruucda arrimaha Amniga
e. Tala siinta Golaha ee arrimaha Amniga.

## CUTUBKA 9-AAD:
## HABRAACA MAALIYADDA

### Qodobka 68-aad:
### Hab-raaca Ansaxinta Miisaaniyadda DGGM

1. Xukuumadda ayaa soo gudbinaysa qabya-qoraalka Miisaaniyadda DGGM iyo faah-faahin qoraal ah oo la socota sida uu sharcigu farayo.
2. Xukuumadda ayaa soo gudbinaysa qabya-qoraalka Miisaanniyadda sanadka soo socda ugu danbeyn bisha Oktoobar **15**-keeda ee sanad kasta.
3. Guddoomiyaha ayaa u gudbinaya xubnaha Golaha qabya-qoraalka Miisaaniyadda.
4. Warbixinta Miisaaniyadda iyo qabya-qoraalka Miisaaniyadda Wasiirka Maaliyadda ayaa ka hor akhrinaya fadhiga Golaha iyada oo looga doodayo fadhiyada xiga.
5. Guddi kasta ee Golaha ama xubno aan ka yareen **10** ayaa guddiga Maaliyadda usoo bandhigi kara soo jeedin wax ka-baddel lagu soo gudbinayo qoraal uu la socdo faah-faahin sababaysan.
6. Dhamaan soo jeedinada wax ka-baddelku waa in ay is barbar-dhigaan dakhliga iyo kharashka Miisaaniyadda.
7. Guddiga Maaliyadda waxa uu qaban-karaa dhageysi dadweyne ee Miisaaniyadda.
8. Soo jeedinta Wasiirka Maaliyadda kadib, Goluhu waxa uu ka doodayaa warbixinta Guddiga Maaliyadda ee ku saabsan Miisaaniyad-sanadeedka.
9. Xukuumaddu waxa ay qaadanaysaa dhammaan wax ka-beddelida Goluhu soojeediyay, kadibna waafajinaysaa Miisaaniyadda ay soo gudbisay oo isbeddelka lagu sameeyay.

10. Qabya-qoraalka wax ka beddelka lagu sameeyay waxa uu noqonayaa nuqulka cusub ee Miisaaniyadda DGGM kaas oo ay xukuumaddu kusoo darayso wax ka-badalka uu Goluhu Ansixiyey.
11. Guddiga Maaliyadda waxa uu daba-gal ku sameynayaa qabya-qoraalka Miisaaniyadda ee wax ka-baddelka lagu sameeyey, kadibna warbixintiisa u soo gudbiyaaGolaha muddo aan ka badneyn **7** maalmood, kadib marka uu helo qabya-qoraalka wax ka-badalka lagu sameeyey ee Miisaniyada DGGM.
12. Golaha ayaa ka doodadaya kadibna u codeynaya qabya-qoraalka Miisaaniyadda wax ka-beddelka lagu sameeyay.
13. Haddii qabya-qoraalka miisaaniyadda la ansixin-waayo, Goluhu waxa uu xukuumadda u qabanayaa in ay muddo **30** cisho gudohood ah ku soo gudbiso qabya-qoraal miisaaniyad cusub.

## Qododka 69-aad:
## Hab-raaca Ansixinta Kabid Miisaaniyad iyo Wax ka-kaddel Miisaaniyad

1. Xukuumaddu waxa ay soo jeedin-kartaa kabid miisaaniyadeed inta sanad miisaaniyadeedka lagu jiro uu dhexda marayo.
2. Qabya-qoraalka Kabid miisaaniyadeedka waxaa la gelinayaa ajendaha fadhiga Golaha.
3. Qodobbada wax ka-baddelka qabya-qoraalka Miisaaniyadda ayaa loo isitcmaalayaa hoggaaminta wax ka-baddelka qabya-qoraalka kabid misaaniyadeedka meesha ay iskaga midka yihin marka laga reebo waqtiyanta xaddidaysa soo jeedinta wax kabaddelka.

## Qodobka 70-aad:
## Habraaca Ansixinta Warbixinta Xisaab-Xir Sanadeedka Miisaaniyadda DGGM

1. Iyada oo uu caawinayo xisaabiyaha guud, Xukuumadda ayaa soo diyaarinaysaa warbixinta xisaab-xir sanadeedka Miisaaniyadda sanadkii la soo dhaafay.
2. Warbixinta xisaab-xir-sanadeedka waxaa la hor gaynayaa Golaha si uu uga doodo, una ansixyo ugu dambeyn **31-da Maarso** ee sanadka xiga.
3. Guddoomiyaha Golaha waxa uu u gudbinayaa warbixinta xisaab-xirka guddiga Maaliyadda iyo xubnaha Golaha ka hor inta uusan Goluhu ka doodin.

## Qodobka 71-aad:
## Habraaca Ansixinta Miisaaniyad-sanadeedka Golaha Wakiillada Galmudug

1. Maamulka Golaha ayaa soo diyaarinaya qiyaasta Miisaaniyadda Golaha
2. Qiyaasta Miisaaniyadda Golaha waxaa loo gudbinyaa Golaha si ш u ansixiyo.
3. Xoghayaha ayaa u xilsaaran maamulka Miisaaniyadda Golaha.

## CUTUBKA 10-AAD:
## KORMEERKA IYO LA XISAABTANKA XUKUUMADDA

### Qodobka 72-aad:
### U Yeeridda Madaxwaynaha iyo ku-xigeenkiisa iyo Wasiirada

1) Golaha waxa uu u yeeri karaa Madaxwaynaha, ku-xigeenkiisa, Wasiirada iyo Guddiyada Madaxa bannaan.
2) Golaha ayaa awood u leh in uu dib u eegid ku sameeyo xilka Mas'uul kasta ee aqbali waaya u yeeridda Golaha Wakiillada Galmudug.

### Qodobka 73-aad:
### Kalsooni-Siinta Xukuumadda

Golaha Wakiillada Galmudug waxa uu codka kalsoonida siinayaa, kalana noqon-karaa Madaxweynaha, ku- xigeenkiisa, Golaha Wasiirada iyo barnaamijka Xukuumadda, Guddiyada iyo Hay'adaha Madax bannaan ee Galmudug waxa uuna go'aankiisa kalsooni-siinta ku meel-marinayaa cod gacan-taag, aqlabiyad, hal dheeri ah, tiradda guud ee Xubnaha Golaha uu ka koobanyahay (50 %+1) sida ku xusan Qododka: 55-aad ee Dastuurka DGGM.

### Qodobka 74-aad:
### Codka Kalsooni kala Noqoshada Xukuumadda

1. Xubna aan ka yareen Shan meelood meel (1/5) tirada guud ee Xubnaha Golaha Wakiillada ayaa soo jeedin-kara Mooshin kalsooni kala noqosho Xukuumadda, waxaana dooda Mooshinku furmee **5** maalmood kadib maalinta la keenay Golaha soo jeedinta.
2. Mooshinka waxaa lagu ansixinayaa tiro hal dheeri (50%+1) ee xubnaha Golaha.
3. Xubin kasta waxa ay xaq u leedahay in ay ku biirto ama ka baxdo soo jeedinta mooshinka inta aan Guddoonka Golaha loo Gudbin.
4. Marka soo jeedin mooshin la keeno Golaha loona codaynayo, Xildhibaanku soo jeedintii hore wuu ka codayn-karaa
5. Marka Mooshin loo keeno Guddoomiyaha waa in uu hubiyaa sharci-nimadaMooshinkaas, kadibna loo gudbiyaa Go'aan ka gaaristiisa Golaha.

### Qodobka 75-aad:
### Soo Jeedinta Kala noqosho Kalsooni

Haddii soo jeedin kala noqosho kalsooni ee xukuumadda lid ku ah uu Goluhu ansixin waayo, lama soo celin karo soo jeedintiisa, ilaa muddo **6** bilood ah.

## Qod 76-aad:
## Su'aal Wadareedka Golaha iyo Xukuumadda

1. **10** xildhibaan ayaa soo gudbin-kara mooshin ay ku codsanayaan Su'aal-wadareed loogu yeerayo Madaxwaynaha ama ku-xigeenkiisa, ama Wasiirada Xukuumada.
2. Haddii Su'aal-wadareedyo ka badan hal ay u dhimantahay Golaha, Guddoomiyaha ayaa siin kara koox kasta in ay yeelato Su'aal-wadareed iyada oo loo kala horumarinayo sida ay usoo kala horeyeen.
3. Su'aal-wadareedka waxaa lagu soo gudbinayaa qoraal ahaan, iyda oo lagu caddaynayo:
   a. Nuxurka Su'aasha oo kooban
   b. Sababta keentay mooshinka
   c. Magacyada iyo saxixyada xubnaha soo jeediyey
4. Su'aal-wadareedka waxaa loo gudbinayaa Guddiga Joogta ee Arrimaha Golaha., waxa uuna u sii gudbinayaa Xukuumadda oo laga doonayo in ay ku soo jawaabto **30** cisho.
5. Haddii Xukuumaddu ka soo jawaabi wayso Su'aal-wadareedkii loo diray sida ku xusan faqradaha kore, waxaana mar kale loo dirayaa go'aan digniin iyo canaan ah.
6. Kooxda soo jeedisay Su'aal wadareedka waxa ay xaq u leeyihiin in Su'aasha ay dood ka furan si waafaqsan xeer hoosaadka Golaha.
7. Madaxwaynaha ama ku-xigeenkiisa ama Wasiirka ay ku wajahantahay su'aashu waxa uu ku qasbanyahay in uu soo jeediyo fikradda xukuumaddu ka qabto arrinta ay su'aal-wadareed ku saabsantahay.
8. Kooxda soo jeedisay Su'aal-wadareedka waxa ay codsan-karaan in Mooshinka loo codeeyo gebagebada su'aal wadareedka, taas oo aan ka baxsanayn muddada loo qoondeeyeydooda.

## Qodobka 77-aad:
## Su'aal oraaheed Xukuumaddu ka Jawaabeyso

1. Inta fadhiga Golaha uu socdo, ajendaha waxaa lagu dari karaa su'aalo xukuumadda la weydiinayo, oo la xiriira qorshe-hawleedkeeda iyo qaabka ay u fulinayso Wasaarad kasta qorshaheeda.
2. Qaabka su'aasha waa in lagu ixtiraamo shuruudaha luqada anshaxa Golaha.
3. Xubinta su'aasha weydinayso ayaa isla su'aashaas akhrinaysa waqtiga suaalaha.
4. Su'aashaas, waa in aysan ka badan mudo hal **(1)** daqiiqo ah.
5. Jawaabta su'aashuna waa in aysan ka badnaan saddex **(3)** daqiiqo.

6. Madaxwaynaha ama ku-xigeenkiisa waxaa loo soo jeedin karaa su'aal, Isaguna waxa uu u gudbin karaa su'aal kasta mid ka mid ah wasiiradiisa haddii uu isagu go'aansado.
7. Xubnaha Golaha waxa ay su'aal codsi qoraal ah u gudbin-karaa Madaxwaynaha ama ku-xigeenkiisa ama Wasiir arrimaha la xiriira hawlahooda.
8. Jawaabta waxaa lagu soo gudbin-karaa qoraal maalinka uu shirayo Goaluhu.
9. Guddiyada Goluhu waxaa ay si toos ah ula xisaabtamayaan,una kormeerayaan hawlaha xukuumadda, waaxyada dawladda iyo hay'adaha kale ee hoos yimaada xilkooda.
10. Haddii wasaarad ama hay'ad hoos timaada shaqada guddiga Golaha aysan warbixin keenin ama warbixinteedu aysan dhameystirneyn, waxaa arintaas Guddigu u codsan karaa in lagu daro ajendaha kulanka Golaha.
11. Guddiyada Goluhu waxa ay uga soo warbixinayaan Golaha dhaqan-galka shuruucdii ay shaqada ku lahaayeen warbixintooduna waa in ay noqotaa qoraal iyo hadal sanadle ah.

## CUTUBKA 11-AAD:
## QODOBO GUUD OO ISKU JIR AH

### Qodobka 78-aad:
### Guddiyadda Madaxa bannaan iyo Hay'adaha Madaxa banaan

1. sida ku cad Qodobka 33-aad faqraddiisa (L) Guddiyada iyo Hay'adaha madaxa bannaan waxaa soo jeedinaya Xukuumadda waxaana ansixinaya Golaha Wakiillada Galmudug, Guddoomiyaha ayaa ku wargelinaya Golaha Magacyada Guddiyada la soo jeediyey; waxaana **30** cisho gudahood ka bilaabata taariikhda soo jeedintu soo gaartay Golaha loo gudbinayaa fadhiga Golaha si loo ansixiyo ama loo diido magacyadaas.
2. Goluhu waxa uu u yeeri karaa Guddoomiye-yaasha Guddiyada Madaxa bannaan. Golaha ayaana awood u leh in uu dib u eegis ku sameeyo xilka mas'uul kasta oo jawaab celin sameyn waaya marka uu Goluhu u yeero.
3. Xilka Guddiyada madaxa bannaan waxaa hagaya shuruucda lagu dhisay.
4. Guddiyada Golaha Wakiilladu waxa ay mas'uul ka yahiin dib u eegista warbixinada Guddiyada madaxa bannaan waqti kasta, kuwaas oo warbixintooda u gudbinaya Golaha Wakiillada.
5. Ugu yaraan sanadkiiba mar, Guddiyada madaxa-bannaan waa in ay warbixinta hawlahooda qoraal iyo bandhigis oraah ah ugu soo gudbiyaan Golaha.

## Qodobka 79-aad:
## Maamulka Golaha Wakiillada Galmudug

1. Hawlwadeennada Golaha Wakiillada Galmudug waxa ay ka mid yihin shaqaalaha rayidka ee Galmudug, waxaana baahidiisa u shaqaleysiiyey Golaha.
2. Xilalka shaqaalaha Golaha waxaa lagu hagaya xeer-maamuleed gooni ah, uuna soo jeediyo Guddiga Maamulka Golaha, uuna ansixiyo Goluhu.
3. Shaqalaha Goluhu waxa ay hoos imanayaan Xoghayaha Guud ee Golaha oo kormeeraya, qiimaynaya shaqaadooda, amarkiisana ay ku shaqeynayaan.
4. Qiimaynta shaqaalaha, dalacsiintooda, anshax-marintooda iyo kala wareejinta shaqadooda waxaa la waafajinayaa xeer-maamuleed uu soo saaro Goluhu.
5. Xoghayaha Guud ayaa ah mas’uulka ugu sarreeya ee u xilsaaran maamulida arrimaha Golaha, una xil saaran arrimaha haykalka-maamul iyo farsamo ee Golaha.

## Qodobka 80-aad:
## Ku Dhawaaqida Xaaladaha Degdega ah

Golaha Wakiillada Galmudug waxa uu Ansixiyaa ama Laalaa ama dheereeyaa xaaladaha deg-daga ah si waafaqsan qodobka 33aad faqraddiisa 1aad xarafkiisa (h) ee DDGGM.

## Qodobka 81-aad:
## Xil-Wareejinta Guddoonka iyo Guddiyada Golaha

**A. Hawlaha Guddiyada xilliga kala-guurka.**

1) Guddi kasta waa in uu diyaariyo waxqabad-kiisa laga soo bilaabo kalfadhigii koowaad, inta uu socdo kalfadhiga ugu danbeeya Golaha, waxaana ka mid ah qoraallada:-
   a) Shuruucda uu Guddigu ka shaqeeyay.
   b) War-bixinnada uu Guddi kasta usoo gudbiyey Golaha.
   c) Soo-jeedinada iyo su’aalihi guddigu usoo-jeediyay Golaha.
   d) Hawlaha kormeerka ee guddigu sameeyay.
   e) Warbixin kooban oo ah go’aanadii iyo talooyinkii war-bixinta Guddiga.
   f) Caqabadihii iyo dhibaatooyinkii soo wajahay Guddiga ee gudashada waajibkiisa.
   g) Go’aanadii laga qaatay xukuumada ee tala-bixintii Guddiga.
   h) Hawlihii qabyada ka ahaa Guddiga iyo asbaabibihii loo qaban-waayey.
   i) Talo-soo jeedinta guddigu siinayo Guddiga cusub ee immaan-doona.
2) Guddoomiyaha Guddi kasta waa in uu soo jeediyaa warbixinta gudigiisa asbuuca ugu danbeeya ee muddada xil-haynta Golaha, si uu Goluhu u ansixiyo.

3) Guddoomiyaha guddi kasta ee xilka lawareegaya waxa la siinayaa nuqulka warbixinta Guddigii hore.

**B. Hawlaha Xoghayaha Guud ee Xilliga kala Guurka**

A. In uu qeybiyo warbixinnada xubnaha ka hor laba asbuuc muddada xil-haynta Golaha.

B. In uu ka diyaariyo laba nuqul warbixin kasta ee Goluhu ansixiyay.

C. In uu ka diyaariyo hawlaha fadhiyada guud nuqullo ka kooban arrimahaan:-

   i. Qaraarada uu Goluhu ansixiyay kuna saxiixan- yihiin Guddoomiyaha iyo Xoghayuhu.
   ii. Hadal-jeedinnadii uu Madaxweynuhu ka jeediyey Golaha.
   iii. Liiska shuruucdii la hor-keenay Golaha muddadii xil-hayntiisa.
   iv. Liiska warbixinaada Guddiyadu usoo gudbiyeen Golaha.
   v. Liiska warbixinnada ee Xiriirada dhex-maray Golaha iyo Golayaasha Federaalka.
   vi. Liiska codsi wadareedyada loo soo bandhigay Golaha.
   vii. Liiska soo-jeedinnada la horkeenay Golaha,
   viii. Liiska hawl-wadeenada, hantida Golaha & daymaha haddii ay jiraan.

D. Xoghayaha ayaa ka diyaarinaya laba nuqul qoraallada uu Guddoomiyaha xilka ka degaya ku wareejinayo Guddoomiyaha xilka qabanaya.

## Qodobka 82-aad:
## Anshaxa Xubnaha Golaha Wakiillada Galmudug.

Hab-dhaqanka Xildhibaanka Golaha Wakiillada Galmudug waxaa Hagaya Shareecada Islaamka, Dastuurka Galmudug iyo Xeer-hoosaadka Goala Wakiillada Galmudug, waxaana waajib ku ah ilaalinta Sharafka, Hay'badda iyo Nidaamka Golaha Wakiillada, iyo in uu xilkiisa u guto daacadnimo iyo hufnaan, kana hormariyo dantiisa danta guud, qaatana Mas'uuliyadda burrinta Xeerkaan ee saameynaysa Xuquuqda Xubnaha Golaha iyo dadka uu matalo Xildhibaanku, haddii uu ka gaabiyo waajibkiisa waxaa loo raacaya qodobadaan:

1. Xildhibaankii burriya xeerka anshaxa waxaa loo gudbinayaa guddiga xeer-hoosaadka, anshaxa, xasaanada iyo daryeelka.
2. Hab-dhawraha ayaa kusoo koobaya qoraal wax-yaabaha cabashada laga soo qoray xildhibaanka una soo gudbiyo Guddomiyaha Golaha si uu ugu sii gudbiyo Guddoomiyaha Guddiga Xeer- Hoosaadka.
3. Xildhibaanku waxa uu xaq u leeyahay in laga dhageysto difaaca eedayntiisa, una soo bandhigo Guddiga, caddeymo iyo markhaati haddii uu hayo.

4. Kadib markii uu dhagaysto guddigu waxa uu baabi'in karaa eedaynta Xildhibaanka
5. Haddii ay ku caddaato in Xildhibaanku jebiyay xeer-hoosaadka waxaa lagu ganaaxi karaa mid ka mid ah qodobada hoose ama iyaga oo la isku daray:
   a. Digniin
   b. Raali gelin  Golaha
   c. Ka joojin soo gelidda Golaha muddo cayiman iyo ka jarid Gunnadiisa 15 maalin hadii ay fududahay jebinta xeer-hoosaadka.
   d. Haddii ay culustahay jebinta xeer-hoosaadku waxaa laga jarayaa gunnadiisa muddo **30** maalin ah.
   e. Gunno ka jarid laba bilood ah iyo ka joojin hal kalfadhi kulamada Golaha ayaa la dhaqan-gelinayaa haddii ay cadaato in uu galay danbi la xiriira laalush ama khalkhal- gelin hawlaha Golaha.
   f. Haddii Xildhibaanku uu galo danbi la xiriira jabinta Dastuurka iyo Shuruucda kale ee Galmudug waxaa loo gudbinayaa Hay'adaha Garsoorka Galmudug.

## Qodobka 83-aad:
## Xeer-Hoosaadka Golaha Wakiillada Galmudug

1. Xeer-Hooosaadka Golaha Wakiilladu waxa uu dhaqan-gelayaa markii uu Goluhu ku ansixiyo cod aqlabiyad hal dheeri ah (50% +1) ee xubnaha Golaha uuna saxiixo Guddomiyaha Golaha Wakiillada Galmudug.
2. Xeer-hoosaadka waxaa wax ka beddel lagu sameyn-karaa markii ay Guddiga Xeer-hoosaadku soo jeediyaan Qodobbo ka mid ah, ama Mooshin kusoo jeeediyaan ugu yaraan 10 xildhibaan, ayna ku taageeraan cod aqlabiyad hal dheeri ah (50%+1) tirada guud ee xubnaha Golaha.
3. Laalista qodobada xeer hoosaadkaan waxaa go'aamin kara aqlabiyad saddex meelood laba (2/3) xubnaha Golaha Wakiillada Galmudug, haddii aysan ka hor imanayn Dastuurka Galmudug iyo kan JFS.

**Tix: XGBGM/0099/23** **Tar: 12 October 2023**

**MEEL-MARINTA XEER-HOOSAADKA GOLAHA WAKIILLADA GALMUDUG.**

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada Galmudug

**Markii uu arkay;** Qodobka 37aad, Faqradiisa 2aad iyo Qodobka 39aad, Faqradiisa 5aad ee Dastuurka Galmudug oo tilmaamaya awoodaha Golaha ee sammeynta iyo ansixinta Xeer-hoosaadka Golaha iyo Qodobka 43aad, Faqradiisa 2aad, Xarafkiis (C) oo xusaya Xilka Guddoomiyaha ee ilaalinta Dastuurka Galmudug iyo Xeer-hoosaadka Golaha.

**Markii uu arkay;** Qodobka 7aad iyo 83aad ee Xeer-hoosaadka Golaha oo qeexaya in Gudoomiyaha Goluhu uu saxiixo dhaqan-galka Xeer-hoosaadka markii uu Goluhu ansixiyo wax-kabaddelka Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada Galmudug

**Markii uu arkay;** Ansixintii Golaha Wakiilladu ku ansixiyey Cod Aqlabiyad ah soo jeedintii Guddiga Xeer-hoosaadka iyo Guddiga Joogtada ee wax-kabaddelka Xeer-hoosaadka Golaha, Fadhigiisii 3aad ee Kalfadhigii 8aad, Taariikh 11 October 2023.

Waxa uu Guddoomiyaha Goluhu meel-mariyey; go'aankii Ansixinta Golaha Wakiilada Galmudug ee wax-ka baddelka Xeer-hoosaadka Golaha iyo Dhaqan-galkiisa, laga bilaabo maalintii uu Goluhu Ansixiyey, Guddoomiyuhuna Saxiixay.

M.ne Dr. Maxamed Nur Gacal
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DGGM

JAMHUURIYADA FEDERAALKA SOOMAALIYA
DOWLAD GOBOLEEDKA SOMALIYEED EE GALMUDUG
GUDDOOMIYAHA BAARLAMAANKA GALMUDUG
SPEAKER OF THE GALMUDUG STATE PARLIAMENT
GALMUDUG STATE OF SOMALIA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA